MAJALADDA MARAG

Cadadka 12-aad | Mar 2026

# KADIB MEELMARINTII SHARCI-DARRADA AHAYD EE DFD:

## MAXAA PUNTLAND LA GUDBOON, FEDERAAL NOOCEESE AYAY SHACABKEEDU DOONAYAAN?

Zakaria Xaaji Axmed Iley "Rabiica"

Bogga: 18



Xigashada Sawirka: Madaxtooyada Puntland

# Qorayaasha Majaladda




**Ahmiyadda kala-madaxbanaanta hay'adaha dowlanimadda iyoKhatarta isku-milankooda**
Cali Xaaji Warsame — 4



**Muxuu Federaalku kaga duwanyahay Nidaamyada kale ee Siyaasadeed?**
Dr. Guuleed Saalax Barre — 9



**Silsiladda Soo-noolaynta Taariikhda Soomaalida:** Sheekada Shiikh Saciid al-Maqdashaawi
Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow — 12



**Adduunka Maanta:** Dagaalka Dhaqaale iyo Saamayntiisa Soomaalida
Burhan Cali Jaamac — 15



**Kadib Meelmarintii Sharci-darrada ahayd ee DFD:** Maxaa Puntland La Gudboon
Zakaria Xaaji Axmed Iley Rabiica — 18




**Maxay Soomaaliya u Saaqiday?** Falanqayn ku Saabsan Asalka Colaadaha Soomaaliya
Cabdullaahi Cabdi (Cabdullaahi Dheere) — 23



**Shahaado Mise Xirfad? Xaqiiqada Suuqa Shaqada ee Ardayda Soomaaliyeed**
Abdirahman Mohamud Said — 28



**Soomaaliya:** Habdhaqanka Madaxda Siyaasaddu Ma Burburin Dawladnimaa Mise Dawlad Dhis?
Axmed Siciid Awnuur — 31



**Aqoonyahanka iyo Dareenka Bulshada Soomaaliyeed**
Dr. Maxamed Cali Faarax — 35



**Maxaa Wiiqay Kaalintii Bulshada Rayadka ee Xoojinta Isla-Xisaabtanka Siyaasadeed ee Soomaaliya?**
Cabdiraxmaan Shiikhdoon — 39



**Bariga Dhexe:** Isbeddello Juquraafi-Siyaasadeed
Dr. Cabdifitaax Nuur Qodax (Ashkir) — 43



**Xirmaynta Dooxooyinka:** Istaraatijiyad Bulsho oo Lagula Tacaalo Abaaraha Soo Noqnoqda
Amiir Abdifatah — 45

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin mudan in aan soo saarno cadadka 12-aad ee Majalladda Marag, oo ah madal warbaahineed oo loogu talagalay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go'aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

Cadadkan qormooyinka xiisaha leh waxaa ka mid ah: caqabadaha hortaagan dhismaha dowladnimada Soomaaliyeed, hirgelinta nidaamka federaalka, saamaynta colaadaha Bariga Dhexe ay ku leeyihiin Soomaaliya, silsiladda soo nooleynta taariikhda Soomaalida, waxa Puntland la gudboon kadib meelmarinta dastuurka, sida aqoonyahanka Soomaaliyeed uga gaabiyay doorkii hoggaamineed ee laga filayay, xaqiiqada suuqa shaqada ee ardayda Soomaaliyeed, iyo qaababka ugu habboon ee lagula tacaali karo abaaraha soo noqnoqda.

**Cabdi Cumar Bile**

Tifatiraha Guud

# AHMIYADDA KALA-MADAXBANAANTA

# HAY'ADAHA DOWLANIMADDA IYO KHATARTA ISKU-MILANKOODA




Cali Xaaji Warsame

*Agaasimaha Machadka Hiil*





Xigashada Sawirka: AI

Wadciga Soomaaliya ku sugantahay maanta wuxuu welwel gelinayaa dad badan oo Soomaaliyeed oo dareensan khatarta dalkeena ku gadaaman iyo dareen la'aanta madaxdeena. Go'aano badan oo ay qaadanayaan dadka xilka maanta ka haya dowladnimda heerarkeeda kala duwan kuma dhisna maslaxadda dalka iyo badqabka dadka. Taas waxaa aasaas u ah faham la'aanta xilka ay ummadda u hayaan iyo kan dowlanimadda. Siyaasiga Soomaaliyeed ma yaqaan xuduuda ay ku dhammaato mas'uuliyadiisa, umana sameysna inuu ilaaliyo xuduudaas, xitaa haddey ku xardhan tahay xeerka ugu sarreeya dalka oo dastuurka ah. Su'aashu waxay tahay: Soomaaliya weligeed ma sidan bay ahayd, mise waa dhaqan dambe oo soo kordhay?

Waqtigii aan dhallinyarada ahaa ee aan bilaabayey waxbarashada 1970-dii dhexdeeda, waxaan si is-daba joog ah u maqli jirey erayga "dowladdii musuqmaasuqa aheyd", oo loo adeegsan jirey maamulka rayidka ahaa ee dalka xukumayey 1960-1969. Eraygan ceebeysan waxaa badanaa adeegsan jirey kuwa damacsanaa inay qiima-tiraan waqtigaas, aniguna fikirkaas kama fogeyn maadaama aan ku hanaqaadey duruuftaas. Waqtigaas, jiilkaygu si weyn uma aqoon xaqiiqada taariikhda dowladdii rayidka ahayd. Si kastaba ha ahaatee, markii aan weynaadey oo aan akhriyey wax badan oo laga qorey dhaqan-siyaasadeedkii xilligii dowladdii rayidka ahayd ayaan ogaaday in wixii naloo sheegayey inta badan ay ahaayeen been-abuur.

Sida uu dhowaan ku tilmaamay Prof. Cabdi Ismaaciil Samatar buugiisa xiisaha leh, "Africa's First Democrats: Somalia's Aden A. Osman and Abdirazak H. Hussen", xilligaas dhabtii wuxuu ahaa xilli ku suntan maamul dowladeed oo aad u soo hanaqaadayey. Dowladdaasi waxay lahayd dastuur la ixtiraamo oo afti dadweyne lagu ansixiyey, siyaasad dhaqaale oo deggan, iyo hab nidaamsan oo lagu dhisayo shuruucda loogu talaggalay in lagu hago dalka. Taasi waxay bixineysaa tilmaan ka duwan tii lagu bar-tilmaameedsadey xilligii kacaanka.

Dhawaantan waxaan muxaadaro u jeediyey koox dhallinyaro hoggaamiyeyaal ah oo ka socday Jaamacadda Bariga Afrika, anigoo kala hadlay cashar ku saabsan muhiimadda hoggaaminta (leadership matters). Intii aan ku jirey tababarka, waxaan u soo bandhigay cod (audio clip) laga duubey khudbad dadweynaha degmadda Aadan-Yaabaal uu u jeediyey Madaxweynihii 2aad ee Jamhuuriyadda, Dr Cabdirashiid Cali Sharmaarke (Alle ha u naxariisto). Khudbadaan dadweyne, Madaxweynahu wuxuu sharraxay nidaamka dowladnimada iyo isu-dheellitirka ka dhexeeya saddexda laamood ee dowladda: Fulinta, Garsoorka, iyo Baarlamaanka. Wuxuu adkeeyey doorkiisa siyaasi iyo hoggaamiye lagu kalsoonyahay oo mas'uul ka ah isku dheelitirka awoodahan iyo ilaalinta dastuurka. Sidoo kale, si fudud ayuu u sharaxay mas'uuliyadaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda iyo sida uu u hogaamiyo xilkaas muhiimka ah ee uu ummadda u hayo.

Wuxuu ku amaanay bulshada degmada Aadan-Yaabaal taageeradooda iyo soo dhaweyntooda diirran iyo sida ay isaga si gaar ah ugu tirsanayaan. Si kastaba ha ahaatee, wuxuu qiray dalabaadkooda xaqa ah ee ku saabsan helitaanka adeeg bulsho dhinaca dowladda, laakiin isla waqtigaas wuxuu xoogga saaray in awoodihiisu aanu u oggolaaneyn inuu qaato doorka laanta fulinta ama inuu farageliyo howlaha fulinta. Si xushmad leh ayuu ugu codsaday wasiirrada la socda inay gudbiyaan fariintan dadka Aadan-Yaabaal. Qofkii daneynaya khudbadaas waxaa si sahlan looga heli karaa YouTube-ka Khudbad uu jeediyey Madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaake 1969).

Dhagahaygu waxay weli ku celceliyaan mawduuca khudbadiisa, oo ku saabsanaa nidaamka dowladnimada iyo sida ay tahay inay u wada shaqeeyaan saddexda laamood ee ay ka kooban tahay, iyadoo mid kasta qaadaneyso dowrkeeda dastuuriga ah. Waxaa xusid mudan in Madaxweynuhu si joogto ah uu ugu baaqayay ka gudubka bulshada ee kala-qaybsanaanta qabiilka iyo dhisidda Soomaali mideysan. Wuxuu xoogga saaray muhiimadda horumarinta dalka, isaga oo carrabka ku adkeeyay in maamulkiisu diiradda saarayo horumarinta deegaanada miyiga ah, dhinaca waxbarashada iyo kaabayaasha dhaqaalaha, gaar ahaan degmooyinka iyo degaanadda la dayacay.

Marka la eego dimuqraadiyadda iyo maamul wanaagga, wuxuu Madaxweynuhu muujiyay rabitaan xooggan oo ah in la dhiirrigeliyo dimuqraadiyad baarlamaani ah, oo loogu talaggalay in lagu dheellitiro awoodda laamaha dowladda. Ujeeddadiisu waxay ahayd inuu muujiyo in la isku dheellitiro awoodda u dhaxaysa Muqdisho oo ah caasimadii jamhuuriyadda iyo gobollada. Wuxuu si cad u qeexay waajibaadka iyo masuuliyadaha hay'adaha kala duwan ee dowladda si loo hubiyo

isku-dheelitirnaanta iyo is-hubinta dhexdooda ah (check and balance). Guud ahaan, khudbadiisu waxay na xusuusinaysaa dood siyaasadeed iyo diimoqraadiyad guun ah oo la jaanqaadi karta caalamka. Si gaar ah ayaan ugu dhiirrigelinayaa qof kasta oo xiiseynaya taariikhda maamulkii dowladdii Soomaaliya ee rayidka ahayd inuu dhageysto khudbadda Madaxweyne Cabdirashid, gaar ahaan dhallinyarada maanta, kuwaas oo arki kara xaaladda hadda jirta iyo sida dowladnimada Soomaaliya loo maamulayo.

Shakhsiyan, aad ayaan uga helay sida uu u soo bandhigay aragtidiisa isagoo aan dadweynaha marin habaabin ama aan u been-sheegin. Runtii waxaa ii caddaatey in fariintiisu aysan kaliya ku socon kuwa hortiisa joogay kulankaas, laakiin sidoo kale uu la hadlayey bulshada Soomaaliyeed oo dhan iyo weliba jiilasha soo socda, oo ay ku jiraan kuwa mararka qaar dib u xaqiijinayay dhaxalkaas. In kasta oo xilligaas wax kasta aysan wada-toosneyn oo ay jireen qaladaad badan, haddana ugu yaraan waxaan aragnay ama maqalnay marka xilligaas laga hadlayo waxay ahayd inuu jiray maamul dowladeed oo ku dhisan sharci iyo xeer, iyadoo uu jirey dastuur la ixtiraamo iyo xuquuqda dadka oo la ilaaliyo.

Milatarigii afgambiyey dowladdii sida dimuqraadiga ah lagu soo doortay ee uu hoggaaminayay Ra'iisulwasaare Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal ka dib dilkii Madaxweyne Sharmaarke, waxay bilaabeen inay dalka ku maamulaan amarro fulineed (executive orders), oo si toos ah uga imaanaya Golahii Sare ee Kacaanka (SRC), kadib markii la joojiyey ku dhaqankii dastuurka aftida lagu ansixiyey. Bilowgii, waxay muwaadiniinta ka qaadeen xuquuqdii hadalka xorta ah, ururradii siyaasadeed, iyo xuquuqda isu-imaatinka (right of assemply). Af-gambigii milatariga ee 1969-kii, oo uu hoggaaminayay Jen. Maxamed Siyaad Barre, si dhaqso ah ayuu u joojiyay dastuurka 1960kii, Baarlamaankii iyo Maxkamaddii Sarena waa kala diray, dhammaan xisbiyadii siyaasaddeedna wuu mamnuucay.

Tani waxay si dhab ah u baabi'isay xuquuqdii dastuuriga ahayd ee muwaadiniinta Soomaaliyeed, isu-imaatinkii xorta ahaa, dibad-baxii, iyo ka qaybqaadashadii siyaasadda, iyadoo lagu beddelay maamul milatari oo amar ku socda.

Tallaabooyinkii dheeraadka ahaa ee ay qaadeen milaterigu waxaa ka mid ahaa baabi'inta qaab-dhismeedkii dimuqraadiyadda dalka–burburintii Golaha Barlamaanka iyo Maxkamadda Sare, taasoo meesha ka saartay is-hubintii iyo isu-dheelitirkii awooda laamaha dowladda ee saddexda ah, mamnuucidda dhammaan xisbiyadii siyaasadeed–taas oo dhammaystir u ahayd dimuqraadiyadda xisbiyada badan, waxaana la hirgeliyey xukunka ku dhisan amar–sharciyada iyo siyaasadaha waxaa si toos ah u soo saarayey golahii sare ee kacaanka.

Waxaa caadi ahayd faaf-reeb ku saabsan hab-dhaqankii dowladdii rayidka ah, waxaana muwaadiniinta loola dhaqmey sidii maxaabiis jiheysan, iyadoo ay sahlaneyd ciddii ka soo horjeesata dowladdii kacaanka in lagu soo eedeeyo falal sharci darro ah, lana mariyo maxkamad milatari, iyadoo weliba si gaar ah loo bartimaameedsadey qayb balaaran oo ka mid ah bulshada, taas oo keentay kacdoon dadweyne oo aan la xakameyn karin, iyadoo ugu dambeyn sababtey in la tuuro dawladdii milatariga ahayd, isla markaana uu dalku galo fowdo, jaahwareer siyaasadeed iyo sharci-darro.

Mar kasta oo awooda laamaha dowladnimada ay gacanta u gasho laanta fulinta waxaa dhuma isu-dheelitirkii iyo is-hubintii dowladnimo, waxaana ka dhasha ku-tagri-fal awooddeed oo ay sameyso laanta fulintu oo madaxweynuhu u sarreeyo. Waxaana taas ka dhalata burbur nidaam dowladeed iyo ku tumasho sharci, waxayna ku dhammaataa burbur iyo kala irdhow bulsho iyo ka soo kabasho la'aan dowladeed, waxaana tusaale nool u ah Soomaaliya, meesha ay ka timid iyo meesha ay maanta joogto.

Dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya ka qarxay 1991 kadib markii xukunka laga tuurey Maxamed Siyaad Barre ayaa furay mid ka mid ah cutubyada madow ee taariikhda Soomaaliya, iyadoo maleeshiyaad ku saleysan qabiil ay la dagaallameen dowladdii, xukunka ka tuureen. Caasimadii dalka waa la burburiyey, gaajo iyo macaluul ayaa kumanaan Soomaali ah u dhinteen, bulshadii Soomaaliyeed waa kala irdhoobeen, iyadoo illaa maanta lagu guuleysan la'yahay dib-u-heshisiin dhab ah oo isku soo celisa dadka Soomaaliyeed. Marar badan waxaan iraahdaa "dadka Soomaaliyeed isku xog ma aha" oo aan ula jeedo in dadkii Soomaaliyeed kala guureen oo reer walba degaan gaar ah ku ururey.

Sababaha ugu waaweyn ee dagaalkii sokeeye waxaa lagu fasiri karaa inuu ahaa xukun keli- talisnimo ah oo ay maamulaysay dowlad kali-talis ah, oo bulshadii Soomaaliyeed kala fogaysay, qabiil qabiil isaga horkeentay, si taas loo fuliyana waxay adeegsatey caburin, eex, qaraabo-kiil iyo sinaan la'aan bulshada dhexdeeda ah. Ugu dambeyna waxaa ka dhashey shaqaaqooyinkii burburiyey awooddii dowladda dhexe, waxaana soo baxay jabhado qabiileysan oo dano qabiil u adeegaya, kuwaas oo salka ka jarey dowladnimadii Soomaaliya. Cidna isma laheyn haddii uu dhaco nidaamkii digtaatooriga keliteliska ahaa

waxaa bedelli doona jabhado sarrifta dalkii iyo dadkii Soomaaliyeed halkii ay xukunka ku raadin lahaayeen wadatashi iyo hoggaan ummadda mideeya.

Jabhadahaas dhammaantood, gaar ahaan USC, waxaa seegtay fursaddii ay dalka ku badbaadin lahaayeen, sida ay sameeyeen jabhadihii ku midoobey EPRDF Itoobiya 1991, markii ay qabsadeen Addis Ababa. Natiijada tooska ah ee dagaalkii ahliga ahaa waxay noqotey dilal baahsan oo ku hagoogan aarsi qabiil, dumin hay'adihii dowladnimo, burburin kaabayaashii dhaqaalaha dalka iyo ugu danbeyn burburintii caasimaddii dalka ee Muqdisho iyo gobollada dalka intooda badan.

Sida uu sheegay Jeffrey Clark (1992), De Waal (1997) iyo Menkhaus (1997), gaajada iyo macluusha ka taagneyd Soomaaliya sanadihii 1992-1993, waxaa sababay boob hanti abaar ba'an, burburintii dalagii beeraha, iyo joojintii gargaarka, waxay la xaqiijiyey in xilliyadaas ay ugu dhinteen dil iyo macaluul qiyaastii 200,000 – 300,000 qof oo Soomaali ah, waxayna barakiciyeen ku dhawaad laba milyan, kuwaasoo ka soo qaxay guryahoodii, gaar ahaan magaaladda Muqdisho, taasoo abuurtay mid ka mid ah dhibbaatooyinka qaxootiga ugu waaweynaa ee soo mara Bariga Afrika.

Nooca ugu xun ee dagaalka sokeeye waxaa lagu asteeyaa burburka hay'adaha dowladda, sida maxkamadaha, goobaha waxbarashada, cusbitaallada, dhismaha ciidanka booliiska iyo xafiisyada dowladda, kuwaas dhammaan si toos ah u joojiyey adeegyadii dowladnimada, waxaana la wareegay kooxo tuugo iyo burcad ah oo burburiyey dhammaan kaabayaashii dhaqaalaha dalka, nidaamkii iyo kala-danbeyntii, taasoo keentay burburkii dowladnimada, dalkiina ka dhigtay mid aan lahayn adeegyo dowladnimo oo shaqaynaya. Waxaan dhawaan ka qoray dagaalkii sokeeye iyo dhinacyo kala duwan oo dembiyadaas ah taxane aan ugu magac darey "Safarkii Laba Kun ee Miles: Casharro Ka Saabsan Dagaalkii Sokeeye ee Soomaaliya - Qaybta I –IV", oo aan ku dabaacey mareegta WardheerNews (A Journey of Two Thousand Miles: Lessons from Somalia's Civil War Part II - WardheerNews).

Cawaaqib-xumada muddada dheer ee dagaalkii sokeeye waxaa ka mid ah kororka dagaalo qabiil oo bulshada dhexdeeda ah, hogaamiye-kooxeedyo manaxayaal ah, ganacsado dalkii sarriftey oo bulshada ku laayey daawo iyo cunto dhacdey, arxanlaawayaal magac-diimeed ku gumaaday shacabka bir-ma-geydada ah, kala go' dalkii oo qeyb ka mid ah ay ku dhawaaqeen madax-bannaani (Somaliland,1991), dalkii oo baylah noqdeen xuduudihiisii bad iyo berriba, cid walbana ay ka yeeshay siday dooneysay, kala-irdhow bulshadii Soomaaliyeed ee wada deganeyd oo gobolo iyo degaano u kala guurey. Natiijada daran ee dagaalkii sokeeye wuxuu sidoo kale ku astaysantahay soo-bixidda kooxo xagjir ah sida Al-Shabaab iyo Daacish oo ka dhashay fowdadii dalka ka dhacdey, isla markaana sii dheerayey qalalaasaha.

Natiijada ugu dambeysa waxay noqotay bulshadii Soomaaliyeed oo kala fogaatey iyo kalsoonidii dhexdooda ahayd oo luntey, taas oo daciifisay nidaam-dhaqameedkii dib-u-heshiisiinta. Burburkii qaran-nimadii Soomaaliyeed iyo lumitaankii muwaadinimada ayaa saameyn xun ku yeeshay shacabka, taasoo ay ka faa'iideysteen siyaasiyiin musuqmaasuq iyo boob hantidii ummadda ku soo baxay, kadibna ka shaqeeyey inaysan bulshadu midoobin ama heshiin. Halkii ay hogaamiyayaasha siyaasadeed la imaan lahaayeen isku-keenida bulshada, waxay ka shaqeeyeen sii-kala-firdhinta bulshada, isla markaana waxay u xuub-siibtaan xaaraan-ku-naaxyo ku howlan dhaca iyo boobka hantida dadweynaha halkii ay u dagaallami lahaayeen xuquuqda dadka, kor u qaadi lahaayeen wacyigooda ummadeed, bixin lahaayeen adeegyo bulsho, sugi lahaayeen amniga ama maareyn laheeyeen nolosha dadweynaha.

35 sano kadib dagaalkii sokeeye ee bilowdey 1991, Soomaaliya waxay u muuqataa mid la il daran maamul-xumo dowladeed oo baahsan, faham la'aan shaqada laamaha dowladnimadda, musuqmaasuq qoto dheer, taageerid ku saleysan sad-bursi qabiil, iyo isla-xisaabtan la'aan naafeeyey hay'adihii dowladnimada, burburiyey dhaqaalaha dowladda, isla markaana horseeday dagaallo qabiil oo degaan ku saleysan oo aan marna joogsaneyn. Dhibaatooyinkaas oo dhan waxay

sii xoojiyeen nuglaanta dowladnimadda, joojiyeen dib-u-habeynta laamaha xukumadda, sababeen faqri iyo hoos-u-dhac heerka nolosha muwaadiniinta, abuureen amni-darro bulshada dhexdeeda ah iyo kalsooni-darro. Ma muuqato faham qoto dheer ee nidaamka dowladnimadda iyo sida uu u shaqeeyo, in madaxdu yihiin adeegalayaal bulsho iyo in ay muhiim tahay in qof madax ah uusan dowladnimadda ka dhigan shaati isaga keliya le'eg oo aan cid kale kula tartami karin, dastuur uu isaga keliya leeyahay iyo hay'ado dowladeed oo isaga keliya u shaqeeya, taas oo ah tii markii horeba burburisay dowladnimadii Soomaaliya, bulshadana u horseeday dagaalkii sokeeye.

Khudbaddii Madaxweyne Sharmaarke waxay dhistay aasaaska dimuqraadiyad shaqeyn karta, taasoo awoodda iyo xukunka aan lagu koobeyn hal xafiis, oo ah kan madaxweynaha, sida aan hadda aragno, halkaas oo madaxweyne kasta oo dalka soo marey tan iyo intii dib-loo-yagleeyey dowladnimadii Soomaaliya Shirkii Carta ee 2000, uu u dhaqmo si ka hor imaneysa sareyn sharciga ama uu isu arko sidii Maxamed Siyaad Barre waqtiyadiisii uu ugu awoodda badnaa.

Madaxda Soomaalida kama muuqato inay hogaamiyeyaal (leaders), hogaaminaya dal jilicsan oo ka soo kabanaya dagaal sokeeye oo daba dheeraadey iyo burbur nidaam dowladeed oo afartan sano jirsadey. Qaybinta awooddaha hay'adaha dowladnimadu ku taagantahay iyo kala madax-bannaanaantoodu waxay u adeegtaa sidii is-hubin iyo isku dheelitir maamul loo heli lahaa, kaasoo horseedi kara hufnaan iyo maamul-wanaag ku dhisan sharci iyo dastuur loo simanyahay. Soomaaliya waxay weli u hamuun qabtaa madaxweyne ama hogaamiye fahamsan awoodiisa dowladeed, ka fog musuqa iyo boobka hantida ummadda, u adeegaya bulshada ee aan ka adeeganeyn, aaminsan in sharcigu sareeyo, intaas ka horna Illaahey ka baqaya oo og inuu adduun iyo aakhiraba kula xisaabtami doono mas'uuliyadda ummadda.

Maanta waxaan mareynaa waqtigii ku haboonaa in aan mar kale dib u milicsano taariikhdii dheereyd ee la soo marey, taasoo wax badan laga baran karo, xalna loogu heli karo dalka. Horaa loo yiri "sameynta isla wixii aad hore u sameyn jirtey adigoo filaya natiijo ka duwan tii hore waa nooc waalida ka mid ah". Sannadka 2026, waa fursad kama dambeys ah oo aan ku sixi karno wixii dawladnimadeena hore uga uga xumaadey, ee diyaar ma u nahay?

**W/Q:** Ali Haji Warsame, MA, MBA, CPA
Executive Director – Hiil Institute
Former Puntland Minister of Education
Email: ali.warsame@hiilinstitute.org



# FAHAMKA FEDERAALKA:

## MUXUU FEDERAALKU KAGA DUWANYAHAY NIDAAMYADA KALE EE SIYAASADEED?



Dr. Guuleed Saalax Barre




Xigashada Sawirka: AI

# 1. HORDHAC

Qaabeynta awoodda siyaasadeed ee heerarka kala duwan ee dowladnimadu waa mawduuc muhiim ah oo si weyn loogu falanqeeyo cilmiga siyaasadda iyo naqshadaynta dastuurada casriga ah. Nidaamyada dowladeed ee kala duwan marka laga faaloonayo, federaalku wuxuu u taaganyahay qaab gaar ah oo awoodda si dastuuri ah loogu kala qaybiyo dowladda dhexe iyo dowladaha heer-gobol. Horumarka dowladaha casriga ah ayaa keenay soo ifbaxa nidaamyo kala duwan oo ujeedadoodu tahay qaabeynta awoodda iyo horumarinta maamulka, taasoo dhalisay su'aal aasaasi ah oo ku saabsan habka ugu habboon ee awoodda dowladeed loogu qaybin karo gudaha dalka.

Maqaalkani wuxuu daba socdaa maqaalkii hore ee cadadka 12aad oo diiradda aan ku saarnay aasaaska aragtiyeed ee federaalka, wuxuuna xoogga saarayaa falanqayn iyo isbarbardhig u dhexaysa federaalka iyo nidaamyada kale ee siyaasadeed sida nidaamka midaysan/dhexe (unitary), nidaamka isbahaysiga (confederal), iyo nidaamyada baahinta awoodda (decentralized arrangements). Federaalku waa mid ka mid ah hababka ugu horumarsan ee la isugu dheellitiro baahiyaha is khilaafsan, maadaama uu isku daro maamul wadaag (shared rule) iyo is-maamul (self-rule), isagoo ka duwan nidaamyada kale ee awoodda hal meel ku urursantahay.

Sidoo kale, federaalku wuxuu hirgeliyaa nidaam dastuuri ah oo suurtageliya wadajirka iyo wada shaqeynta heerarka kala duwan ee dowladeed, isagoo leh awoodo si cad loo qeexay lana damaanad qaaday. Sidaas darteed, federaalku ma ahan oo keliya qaab awood qaybin ah, balse waa hannaan dheellitiraya midnimada iyo kala duwanaanta, gaar ahaan bulshooyinka kala duwan ama kasoo kabanaya colaadaha.

# 2. FEDERAALKA IYO NIDAAMKA MIDAYSAN/DHEXE (UNITARY SYSTEM)

Isbarbardhigga ugu muhiimsan ee nidaamyada siyaasadeed wuxuu u dhexeeyaa federaalka iyo nidaamka midaysan/dhexe, kuwaas oo si weyn ugu kala duwan habka ay u qaybiyaan awoodda dowladeed. Nidaamka midaysan/dhexe awooddu waxay ku urursan tahay heerka dowladda dhexe, halka heerarka hoose ay ku shaqeeyaan awoodo ay siiso xarunta dhexe oo keliya. Inkasta oo dalal badan ay ku dadaalaan inay awoodo badan hoos u daadajiyaan, hadana awoodahaas ma aha kuwo dastuuri ahaan la dammaanad qaaday, waxaana wax laga beddeli karaa ama laga laaban karaa xilli walba oo dowladda dhexe go'aansato.

Dhanka kale, federaalku wuxuu ku dhisanyahay qaybin awood oo dastuuri ah, taas oo si cad u qeexan una dammaanad qaadaysa awoodaha heerarka kala duwan ee dowladda. Qaabkani wuxuu kor u qaadayaa ka qaybgalka matalaadda siyaasadeed iyo helista maamul u dhow shacabka, isla markaana wuxuu si wax ku ool ah uga jawaabaa kala duwanaanshaha bulshada iyo deegaanada. Inkasta oo ay jiri karaan caqabado la xiriira is-waafajinta siyaasadaha heerarka kala duwan, federaalku wuxuu leeyahay dheellitirnaan iyo dabacsanaan ka caawinaysa dowladaha inay isku hayaan midnimada qaranka iyo ismaamulka gobolada.

# 3. FEDERAALKA IYO NIDAAMKA ISBAHAYSIGA (CONFEDERAL ARRANGEMENTS)

Nidaamyada isbahaysiga (confederal arrangements) waxay matalaan qaab dowladnimo oo ku dhisan iskaashi u dhexeeya dowlado madaxbannaan oo siiya awood kooban maamul dhexe. Si ka duwan federaalka, halkaas oo madaxbannaanida si dastuuri ah loo wadaago, nidaamka isbahaysigu wuxuu ilaalinayaa madaxbannaanida buuxda ee dowladaha xubnaha ah, halka dowladda dhexe ay leedahay door xaddidan oo ku tiirsan oggolaanshaha dowladaha xubnaha ah. Tusaalooyin taariikhi ah waxaa ka mid ah Maraykanka xilligii Articles of Confederation, halka Midowga Yurub uu maanta leeyahay astaamo u dhow nidaamkan.

Farqiga aasaasiga ah ee u dhexeeya federaalka iyo nidaamka isbahaysigu wuxuu ku saleysanyahay halka ay ku taallo awoodda ugu dambeysa. Federaalka, awoodda waxaa si cad u qaybiya dastuurka, iyadoo labada heer ee dowladeed ay leeyihiin awoodo sugan, halka nidaamka isbahaysiga ay awooddu si buuxda u taallo heerka dowladaha xubnaha ah, taasoo ka dhigaysa dowladda dhexe mid daciif ah. Sidaa darteed, nidaamyada isbahaysigu waxay inta badan la kulmaan caqabado la xiriira fulinta go'aannada, is-waafajinta siyaasadaha, iyo joogtaynta wadajirka, maadaama ay ku tiirsanyihiin rabitaanka iyo wada shaqeynta dowladaha xubnaha ka ah. Federaalku

wuxuu qayb ahaan ka dhashay baahida loo qabo in la xalliyo daciifnimada nidaamyada isbahaysiga, isagoo bixinaya qaab ka xooggan oo wax ku ool ah, isla markaana ilaalinaya danaha is-maamul goboleedka.

## 4. FEDERAALKA IYO NIMAADYADA BAAHINTA AWOODAHA (DECENTRALIZED ARRANGEMENTS)

Nidaamyada baahinta awooddu (decentralized arrangements) waxay tixraacaan qaab dowladeed oo awoodaha qaarkood loogu wareejiyo heerarka hoose sida gobollada ama degmooyinka, iyadoo weli ay awoodda ugu dambeysa ay taallo heerka dowladda dhexe. Si ka duwan federaalka, halkaas oo awoodaha gobolladu ay yihiin kuwo dastuuri ahaan la dammaanad qaaday, nidaamyada baahinta awooddu waxay ku saleysanyihiin go'aamo siyaasadeed ama sharciyo uu dejiyo heerka dhexe, kuwaas oo wax laga beddeli karo ama lagala noqon karo xilli walba. Dalal badan ayaa adeegsada nidaamkan si ay u kordhiyaan hufnaanta maamulka iyo adeeg-bixinta, iyagoo aan si buuxda u qaadan nidaamka federaalka.

Farqiga ugu weyn ee u dhexeeya federaalka iyo nidaamyada baahinta awooddu waa heerka sugnaanta iyo madaxbannaanida awoodaha heerarka hoose. Federaalka, awoodaha dowladaha gobolladu waa kuwo dastuuri ah oo aan si fudud looga qaadi karin, halka nidaamyada baahinta awooddu ay weli ku hoos jiraan awoodda dowladda dhexe. Inkasta oo baahinta awooddu ay kor u qaadi karto tayada maamulka, u dhowaanshaha shacabka, iyo dabacsanaanta fulinta siyaasadaha, haddana waxay la kulmi kartaa caqabado la xiriira joogtaynta awoodahaas iyo ku tiirsanaanta go'aannada heerka dhexe. Sidaa darteed, federaalku wuxuu keenaa dammaanad iyo dheellitirnaan ka sarreysa, halka baahinta awooddu ay inta badan tahay tallaabo maamul oo ka hooseysa heerka federaalka.

## 5. GUNAANAD

Federaalku waa qaab dowladeed oo dabacsan kuna dhisan isku dheellitirka midnimada qaranka iyo aqbalidda kala duwanaanshaha bulshada, iyadoo loo marayo qaybinta awoodda iyo ilaalinteedaba hab dastuuri ah. Waxa uu kaga duwanyahay nidaamyada kale sida nidaamka midaysan/dhexe, isbahaysiga, iyo nidaamyada baahinta awoodda, waa heerka uu gaarsiisanyahay dammaanad qaadka awood-qaybsiga kaas oo leh damaanad-qaad dastuur.

In kasta oo aanu jirin hal nidaam siyaasadeed oo si guud ugu habboon dhammaan dalalka caalamka, hadana federaalku wuxuu u taaganyahay nidaam wax ku ool ah oo lagu maareeyo bulshooyinka leh kala duwanaansho qoto dheer, gaar ahaan kuwa kasoo kabanaya colaadaha. Wuxuu fududeeyaa kor u qaadista ka-qaybgalka siyaasadeed, wuxuu xoojiyaa matalaadda, wuxuu adeegyada dowladadeed u soo dhoweeyaa shacabka, wuxuuna yareeyaa dareenka faquuqa siyaasadeed ee keeni kara khilaaf iyo colaado ka dhexdhasha bulshada taas oo ugu dambayn keeni karta dagaalo sokeeye iyo burbur dawladeed.

Si kastaba ha ahaatee, guusha nidaamka federaalku waxay si weyn ugu xirantahay xaaladda siyaasadeed ee dalka, tayada iyo hufnaanta hay'adaha la dhisayo, iyo heerka ay hoggaamiyeyaasha siyaasadeed uga go'an tahay ilaalinta iyo ku dhaqanka mabaadi'da dastuuriga ah. Waxa kale oo door muhiim ah ka ciyaaraya jiritaanka hannaan caddaaladeed oo lagu xalliyo khilaafaadka, kalsoonida u dhexeysa heerarka kala duwan ee dowladda, iyo awoodda lagu xaqiijinayo wada shaqeyn wax ku ool ah. Haddii arrimahan si habboon loo maareeyo, federaalku wuxuu noqon karaa saldhig adag oo lagu dhiso dowladnimo xasilloon, loo wada dhanyahay, isla markaana waarta.

Maqaalka soo socda ayaynu ALLE idankiis kaga faaloondoonaa caqabadaha ku xeeran hirgelinta federaalka Soomaaliya iyo sida looga bixikaro.


## TAXANAHA: DAL IYO DAD

Dal iyo Dad waa taxane maqaallo joogto ah oo bil walba ku soo bixi doona Majalladda Marag, kaas oo si qoto dheer u falanqeynaya mawduucyo la xiriira dawladnimada, federaalka iyo taariikhda Soomaaliya. Taxanahani wuxuu isku xirayaa waayo-aragnimo taariikheed, aragti cilmiyeed iyo duruufaha siyaasadeed ee taagan, isaga oo ujeedkiisu yahay in la helo faham qoto dheer oo ka turjumaya casharrada taariikhda, dhismaha dawladnimo casri ah, iyo kaalinta muwaadinka ee masiirka qaranka. Sidoo kale, Dal iyo Dad wuxuu dhiirrigelinayaa dood aqooneed, wacyigelin bulsho iyo kobcinta aragti fog oo ku wajahan mustaqbalka dalka.

**W/Q:** Dr. Guuleed Saalax Barre

# SILSILADDA SOO-NOOLAYNTA TAARIIKHDA SOOMAALIDA:

## SHEEKADA SHIIKH SACIID AL-MAQDASHAAWI



Dr. Cabduraxman Baadiyow



Bal qiyaas taariikhda ballaaran ee dunida, mid ay ku dhex tolan yihiin sheekooyin, ilbaxnimooyin iyo codad kala duwan oo dhammaantood ka qayb qaata sawirka guud ee taariikhda aadanaha. Si kastaba ha ahaatee, marka aad dhex marayso dhanka hodanka ah ee taariikhda, waxaa si cad uga muuqda hal cutub oo aan weli si buuxda loo qorin: taariikhda Soomaalida ee xilliyadii dhexe. Muddo dheer cutubkani wuxuu ahaa mid aan si fiican loo diiwaangelin ama si qalloocan loo soo bandhigay; ilbaxnimadiisii firfircoonayd waa la dayacay, halyeeyadiisiina lama xusin, halka sheekooyinkiisa badanaa lagu soo gudbiyay aragtiyo fog oo aan si dhab ah u muujin sharafta iyo qoto-dheeraanta bulshada Soomaaliyeed.

Qiyaas magaalooyinka xeebaha Soomaaliya ee waagaas, magaalooyin buuq badan oo ganacsi, halkaas oo maraakiib ka imaanaysa Carabta, Faaris, Hindiya iyo Afrika ay ku kulmaan, iyagoo keenaya xawaash, xariir iyo aqoon. Magaalooyinkaas firfircoon, culimadu waxay ku doodaan masalooyinka diinta iyo sharciga hooska barxadaha; badmaaxiintu waxay dhex maraan badda Hindiya iyagoo isku xiraya qaarado; ganacsataduna waxay dhisaan shabakado ganacsi oo waaweyn. Waxay ahayd adduun ay ka buuxaan maskax, iimaan iyo ganacsi, Soomaalidu xilliyadii dhexe waxay lahayd ilbaxnimo firfircoon oo leh guulo badan.

Si kastaba ha ahaatee, inkastoo xaqiiqdan jirta, taariikhda Soomaalida ee xilligaas inta badan waxay ku hartay hooska buugaagta taariikhda. Mararka qaar haddii la xuso, waxaa lagu koobayaa faallooyin yar ama aragtiyo aan si dhab ah u muujin dhaqankeeda iyo sharafta dadkeeda. Laakiin taariikhdu ma aha wax dhagax ku qoran; waa sheeko nool oo si joogto ah isu beddesha, taas oo u baahan in dib loo eego, la baaro, lana soo celiyo.

Qorayaasha taariikhda Soomaaliyeed, aqoonyahannada iyo sheeko-yaqaannadu maanta waxay joogaan meel muhiim ah. Waxaa ina saaran mas'uuliyad, ma aha oo keliya in la qoro wixii hore loo sheegay, balse in la maqlo waxyaabaha la aamusiiyay, la su'aalo sheekooyinka la aqbalay, lana buuxiyo meelaha bannaan ee taariikhda. Iyadoo ruuxdaas soo celinta taariikhda ah, waxaan u jeedineynaa dareenkeenna shaqsi taariikhi ah oo muhiim ah: Shiikh Saciid al-Maqdashaawi, oo ahaa iftiin ka mid ah aqoonta iyo diinta Soomaaliyeed.

Marka la xuso safarradii waaweynaa ee taariikhda, dhowr magac ayaa si degdeg ah maskaxda ugu soo dhaca, Marco Polo, ganacsadihii Venetian-ka ahaa ee safarradiisu gaareen Aasiya ilaa maxkamadda boqor Mongol ah Kublai Khan; iyo Ibn Battuta, sahamiye Moroccan ah oo lugihiisu mareen saxaro, bad iyo magaalooyin laga bilaabo galbeedka Afrika ilaa Shiinaha. Sheekooyinkooda waxaa la qoray qarniyo badan, waxayna noqdeen qayb ka mid ah sawirka aan ka haysanno dunida xilliyadii dhexe. Laakiin maxaa dhici lahaa haddii taariikhdu ay seegtay safar kale oo la mid ah? Maxaa dhacaya haddii nin kale oo leh geesinimo iyo xiiso aqooneed uu maray waddooyinkaas, laakiin magaciisa uu ku lumay hooska taariikhda?

Si aan u helno shaqsigaas la illoobay, waa inaan u jeedsannaa koonfurta, xeebaha quruxda badan ee Geeska Afrika. Halkaas, qarnigii 14aad, Magaalada Muqdisho waxay ahayd xarun ganacsi, aqoon iyo diinta Islaamka. Ma ahayn magaalo yar oo la illoobay, balse waxay ahayd magaalo firfircoon oo ay ku kulmaan ganacsato ka imaanaysa Carabta, Faaris, Hindiya iyo Afrika, iyagoo is dhaafsanaya alaab, fikrado iyo dhaqamo. Magaalada waxaa ka muuqday qubbadaha iyo minaaradaha masaajidda, halka hawada ay ka buuxaan urta badda, alaabo ganacsi iyo hadallada culimada ee doodaha aqooneed.

Magaaladan firfircoon dhexdeeda waxaa 1301 ku dhashay wiil lagu magacaabo Saciid, kaas oo mustaqbalka loo yaqaan Saciid al-Maqdashaawi. Tan iyo yaraantiisii, Saciid wuxuu lahaa maskax xiiso badan iyo qalbi doonaya aqoon. Wuxuu ka faa'iidaystay cilmiga culimada magaalada, wuxuu bartay luqadaha ganacsatada, wuxuuna dhagaystay sheekooyinka dhulal fog. Laakiin qaddarkiisu ma ahayn inuu ku ekaado Muqdisho. Jacaylka aqoonta iyo rabitaanka inuu arko dunida ayaa ku riixay safarro fog. Safarradiisu waxay u qaadeen dhinaca Makka iyo Madiina, halkaas oo uu muddo 28 sano ah ku qaatay barashada fiqiga, shareecada iyo cilmiga ruuxiga ah. Habeen iyo maalin ayuu wax baran jiray, isagoo ka qayb geli jiray duruus ilaa waaberiga.

Dadaalkiisa iyo aqoontiisa ayaa soo jiitay culimada waaweyn ee labada magaalo. Wuxuu noqday aqoonyahan la qadariyo, oo taladiisa la weydiiyo. Wuxuu la kulmay madax iyo sharafyo ka mid ah maamulka labada magaalo, kuwaas oo ixtiraamay xikmaddiisa. Waqti ka dib, Shiikh Saciid wuxuu noqday macallin iyo hage ruuxi ah. Arday ka kala yimid dhulal fog ayaa u iman jiray si ay uga bartaan cilmigiisa. Casharradiisu waxay noqdeen meel ay ku kulmaan maskaxaha iyo qalbiyadu.

Laakiin safarkiisu halkaas kuma dhammaan. Wuxuu u gudbay Hindiya, gaar ahaan xeebta Malabar, halkaas oo uu kula kulmay culimo iyo ganacsato Muslimiin ah. Halkaas ayuu la shaqeeyay faqih caan ah oo la oran jiray Faqih Xuseen, kaas oo lagu tiriyo inuu qoray mid ka mid ah qoraalladii ugu horreeyay ee fiqiga Shaaficiga ee gobolka. Safarradiisu waxay sii gaareen Bangladesh iyo xitaa Shiinaha xilligii boqortooyadii Yuan. Taas oo ka dhigaysa mid ka mid ah Afrikaanadii ugu horreeyay ee gaara Bariga Aasiya. Culimada Muslimiinta waxay Shiinaha u arkeen meel aqoon laga raadiyo, iyagoo ku dhiirranaya hadalkii caanka ahaa ee Nabi Muxammad (NNKH): “Raadiya cilmiga xitaa haddii uu Shiinaha ku yaal.”

Intii uu ku sugnaa Hindiya, Shiikh Saciid wuxuu la kulmay sahamiye kale oo caan ah, Ibn Battuta. Ibn Battuta wuxuu si xiiso leh u dhageystay sheekooyinka Shiikh Saciid ee ku saabsan Shiinaha iyo boqortooyada Yuan. Qaar ka mid ah aqoonyahannadu waxay aaminsanyihiin in xogtaas ay ka caawisay Ibn Battuta qorista safarkiisa caanka ah “Rihla.” Inkasta oo safarradiisu aad u ballaarnaayeen, magaca Shiikh Saciid wuxuu ku haray hooska taariikhda. Wuxuu geeriyooday qiyaastii 1361 ama 1365, meel ka fog dalkiisii hooyo. Wuxuu ahaa nin aan u safrin ganacsi ama dagaal, balse u safray aqoon, diinta iyo isku xirka dhaqamada.

Shiikh Saciid wuxuu ahaa buundo isku xirta Afrika iyo Aasiya, aqoonyahan, safar-yaqaan iyo hage ruuxi ah. Noloshiisu waxay ina xusuusinaysaa in taariikhda aan lagu dhisin oo keliya magacyada caanka ah, balse sidoo kale ay jiraan dad badan oo aamusnaan ku beddelay dunida. Sidaas darteed, sheekada Shiikh Saciid waa in lagu daraa manhajka dugsiyada Soomaaliya. Dhallinyarada Soomaaliyeed waa inay ogaadaan in awoowayaashood aysan ahayn oo keliya dad badbaaday, balse ay ahaayeen cilmi-baarayaal, culimo iyo sahamiye saameyntoodu gaartay qaarado badan. Marka dhallinyarada Soomaaliyeed ay bartaan sheekadiisa, waxay ka helayaan dhiirrigelin, sharaf iyo dareen aqoonsi. Safarkiisu wuxuu noqonayaa iftiin muujinaya in taariikhda Soomaaliya ay tahay mid qoto dheer oo ku xiran dunida inteeda kale.

Ugu dambayn, qiyaas dhallinyaro Soomaaliyeed oo ku dhalatay meel ka mid ah qurbaha, xitaa Shiinaha, kuwaas oo ku nool bulshooyin kala duwan, balse qalbigooda ku haya jacaylka taariikhda dalkooda. Markay helaan sheekooyinka culimada Soomaaliyeed sida Shiikh Saciid, waxay helayaan xoog cusub oo ay ku dhistaan aqoonsigooda, una noqdaan buundo u dhexeysa bulshadooda cusub iyo dhaxalka Soomaaliya. Bishii Nofeembar 2024, waxaan booqday Shiinaha, halkaas oo aan ku arkay Matxafka Jaamacadda Zhenjiang Normal bandhig gaar ah oo ku saabsan Shiikh Saciid. Bandhiggu wuxuu soo bandhigay sawirro iyo dukumiinti muujinaya doorkiisii aqoonyahan iyo diblomaasi Soomaaliyeed, iyo sidoo kale ganacsigii xayawaanka Afrika laga dhoofin jiray sida geri, haramcad iyo shimbiro dhif ah oo loo diri jiray Shiinaha iyada oo loo marayo ganacsiga badda. Waxa ugu xiisaha badnaa waxay ahayd sida bandhiggu u muujiyay Shiikh Saciid inuu ahaa buundo dhaqan iyo aqoon oo u dhexeysa Soomaaliya iyo Bariga Aasiya. Booqashadani waxay ii xaqiijisay doorka taariikhiga ah ee Soomaaliya ku lahayd isdhexgalka ilbaxnimooyinka dunida.

**W/Q:** Dr. Cabduraxman Baadiyow



# ADDUUNKA MAANTA: DAGAALKA DHAQAALE IYO SAAMAYNTIISA SOOMAALIDA



Burhaan Cali Jaamac




Xigashada Sawirka: AI

## ASALKA IYO QAAB-DHISMEEDKA NIDAAMKA DHAQAALE EE CAALAMIGA AH

Si loo fahmo tartanka maanta u dhexeeya Maraykanka iyo Shiinaha, waa in dib u akhrin lagu sameeyo sooyaalka. Dhaqaalaha adduunku ma ahan mid hal mar si kedis ah isu beddelay, balse waa nidaam soo maray wareegyo awood isbeddel ah (power transition).

Qarniyadii 15-aad iyo 16-aad, awoodda dhaqaale waxay ku urursanayd dawladaha Yurub ee gacanta ku hayay marin-biyoodka iyo ganacsiga badaha sida Boqortooyada Ingiriiska iyo Isbaanishka. Xakamaynta marinnada ganacsi ayaa noqotay saldhigga awoodda ee waqtigaas.

Qarnigii 19-aad, nidaamka Gold Standard ayaa mideeyey suuqyada dunida. Isbeddelka ugu weyn se wuxuu yimid kadib Dagaalkii Labaad ee Adduunka, markii shirkii Bretton Woods Conference la dhisay nidaam maaliyadeed cusub. Halkaas waxaa ka dhashay hay'ado sida International Monetary Fund iyo World Bank, doollarkana waxaa loo aqoonsaday laf-dhabarta ganacsiga caalamiga ah.

Xitaa markii Richard Nixon 1971-kii joojiyey ku xirnaanshihii doollarka iyo dahabka, nidaamku ma burburin. Waxa uu u wareegay kalsooni ku dhisan awoodda dhaqaale, suuqyada maaliyadeed iyo Awood-sheegashada Maraykanka. Sidaas awgeed, waxa maanta taagan ma aha muran cashuuro ama badeecooyin oo keliya, balse waa tartan ku saabsan cidda dejinaysa xeerarka nidaamka maaliyadeed iyo ganacsiga caalamiga ah.

## TARTANKA NIDAAMYADA: MARAYKANKA IYO SHIINAHA

Tan iyo 1945-tii, Maraykanku wuxuu hoggaaminayey nidaam maaliyadeed oo caalami ah. Doollarku wuxuu noqday lacagta lagu kala iibsado badeecadaha waaweyn sida saliidda, bangiyada waaweyn iyo nidaamyada lacagbixintuna oo si toos ah ama si dadban ugu xiran qaab uu Maraykanku saameyn ku leeyahay. Taas macnaheedu waa in awoodda maaliyadeed ay mararka qaar ka miisaan culus tahay awoodda militari, maadaama dal kasta oo ka baxa nidaamkan uu wajihi karo cunaqabatayn iyo go'doon maaliyadeed.

Shiinuhu wuxuu si istiraatiiji ah u bilaabay dhisidda dariiq kale. Halkii uu si degdeg ah u jebin lahaa nidaamka jira, wuxuu doortay geeddi-socod tartiib ah oo ku dhisan kala-duwanaansho lacageed, heshiisyo tamar oo aan doollar ku xirnayn, iyo xoojinta kaabayaal maaliyadeed oo u gaar ah. Xiriir dhow oo uu la sameeyey dalal sida Iiraan iyo Finisiweella ayaa u suurtageliyey inuu tijaabiyo qaab ganacsi oo ka madaxbannaan nidaamka Maraykanka.

Sidaas darteed, waxa muuqata in tartanku yahay mid nidaamyo is-hor fadhiya, halkii uu ka ahaan lahaa muran ganacsi oo kooban. Adduunku wuxuu u sii jeedaa kala qaybsanaan dhaqaale oo ay dalal qaar si buuxda ula safan doonaan Maraykanka, kuwo kalena la safan doonaan Shiinaha, halka qaar kalena ay isku dayi doonaan dhexdhexaadnimo danahooda ku dhisan.

## NIDAAMKA CAALAMIGA AH IYO MEESHA WAX U SOCDAAN

Marxaladdan cusub waxay muujinaysaa in awoodda dhabta ahi aysan ku xirnayn lahaanshaha kheyraad keliya, balse ay ku xirantahay cidda maamusha nidaamka wareejiya kheyraadkaas. Qofka xakameeya lacagta, bangiyada, caymiska iyo hababka lacagbixinta ayaa leh awood ka sii qoto dheer tan hubka iyo ciidanka.

Isbeddelkan maanta socda waa mid dib-u-qaabayn ah. Nidaamkii Bretton Woods ku dhisnaa ee ku tiirsanaa doollarka ayaa weli xooggan, balse waxa hoostiisa ka socda dhismaha qaab kale oo tartiib u koraya. Mustaqbalka dhow, waxa suuragal ah in dunidu gasho marxalad ay laba nidaam oo maaliyadeed si wadajir ah u jiraan, mid walbana leeyahay xulafadiisa iyo shabakaddiisa ganacsi.

## SAAMAYNTA SOOMAALIDA IYO WAXA LA GUDBOON

Inkasta oo Soomaaliya aysan ahayn quwad dhaqaale oo weyn, haddana isbeddelkan caalamiga ah si toos ah ayuu u taabanayaa. Dhaqaalaha dalka oo si weyn ugu tiirsan doollarka iyo soo dejinta badeecooyinka dibadda ayaa ka dhigaya mid nugul marka qiimaha doollarku is beddelo ama nidaamyada maaliyadeed ay kala qaybsamaan.

Haddii tartanka nidaamyadu sii xoogaysto, waxaa iman kara sicir-barar, jahawareer suuqeed iyo cadaadis ku yimaada lacagaha qalaad ee dalka soo gala. Dhanka kale, waxaa sidoo kale jiri kara fursado maalgashi iyo iskaashi cusub haddii Soomaaliya si miyir leh u wajahdo isbeddelkan.


Waxa la gudboon Soomaalida waa in la dhiso nidaam maaliyadeed oo gudaha ah oo adkaysi leh, lana kobciyo wax-soo-saarka si aan si buuxda loogu tiirsanaan soo dejinta. Sidoo kale, siyaasadda dibadda waa in lagu saleeyaa dhexdhexaadnimo ku dhisan dan-qaran, si looga fogaado ku milmid tartan quwado waaweyn.

## GABAGABO

Ugu dambayn, dagaalka dhaqaale ee maanta socda ma aha mid ku kooban canshuur, badeeco ama heshiisyo ganacsi oo kooban; waa tartan ku saabsan cidda maamuleysa nidaamka dunida. Taariikhdu waxay ina bartay in marka nidaam caalami ahi gaaro heerkiisa ugu sarreeya, uu bilaabo marxalad dib-u-qaabayn ah oo laga yaabo inay dhaliso nidaam kale.

Soomaaliya iyo dalalka la midka ah waxay ku jiraan meel u baahan feejignaan iyo istiraatiijiyad dheer. Cidda fahamta jihada isbeddelka ayaa ka faa'iidaysan karta; cidda iska indhatirtana waxay noqon kartaa mid ay duruufuhu jiheeyaan. Sidaa darteed, fahamka dagaalka dhaqaale ee caalamiga ah ma aha arrin aqooneed oo keliya, balse waa arrin la xiriirta mustaqbalka ummadaha yaryar iyo sida ay uga dhex muuqan doonaan nidaamka cusub ee dunida.

**W/Q:** Burhaan Cali Jaamac



# KADIB MEELMARINTII SHARCI-DARRADA AHAYD EE DFD:

## MAXAA PUNTLAND LA GUDBOON, FEDERAAL NOOCEESE AYAY SHACABKEEDU DOONAYAAN?



**Zaki Rabiica**



**Xigashada Sawirka**: Madaaxtooyada Puntland

## HORDHAC: FEDERAALKA IYO TAARIIKHDA DIB-U-DHISKA SOOMAALIYA

Soomaaliya waxay soo martay burbur dawladnimo oo dheer kadib dagaalkii sokeeye ee bilowday 1991. Burburkaasi wuxuu sababay in dalka uu galo marxalad adag oo ay ku burbureen hay'adihii dowliga ahaa, nidaamkii maamulka, iyo kalsoonidii bulshada ee dowlad dhexe. Intii lagu jiray sannadihii xigay, waxaa soo baxday aragti siyaasadeed oo ku saabsan sida dib loogu dhisi karo dowlad Soomaaliyeed oo shaqayn karta. Aragtiyahaas waxaa ugu muhiimsanaa in la qaato nidaam federaal ah (Federal System), si looga hortago soo noqoshada awood-urursigii xad-dhaafka ahaa ee hore dalka ugu riday burburka.

Nidaamka federaalka waxaa loo arkay xal siyaasadeed oo oggolaanaya in awoodda dowladeed lagu qaybiyo heerar kala duwan, si maamul goboleedyadu u yeeshaan awood ballaaran oo ku filan maamulka gudaha, halka dowladda dhexe ay qaadato hawlaha qaran ee wadaagga ah sida difaaca, maamulka maaliyada, siyaasadda dibadda, iyo ilaalinta midnimada dalka.

Markii Puntland la aasaasay 1998, go'aankeeda siyaasadeed wuxuu ahaa mid ku dhisan aragti federaal ah oo cad. Puntland ma dooran in ay noqoto maamul gooni u istaaga, balse waxay isu aragtay tiirka ugu horreeya ee lagu dhisayo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Federaalkaas la rabay wuxuu ahaa nidaam awooddu ka bilaabato maamul goboleedyada (bottom-up federalism), halka dowlad dhexe ay noqoto hay'ad isku xirta nidaamka qaran.

Si kastaba ha ahaatee, geeddi-socodka wax-ka-beddelka iyo ansixinta dastuurka Soomaaliya ee dhowaan la sameeyay wuxuu abuuray khilaaf siyaasadeed oo weyn. Khilaafkaasi wuxuu si gaar ah uga muuqday Puntland, halkaas oo ay ka taagantahay dood la xiriirta qaabka federaalka dalku noqanayo, sida awoodaha loo qaybiyay, iyo sida loo maareeyay arrimaha khayraadka, amniga, iyo garsoorka.

Doodda Puntland ma aha oo keliya diidmo siyaasadeed, balse waa aragti salka ku haysa nooca federaalka ay shacabka Puntland u arkaan mid ku habboon Soomaaliya.

## HABRAACA ANSIXINTA IYO WAX-KA-BEDDELKA DASTUURKA: KHILAAFKA SHARCIYEED

Qodobka ugu horreeya ee doodda wax-ka-beddelka iyo ansixinta dastuurka Soomaaliya wuxuu khuseeyaa habraaca sharci ee loo maray geeddi-socodkaas. Dastuurka Federaalka ee ku-meel-gaarka ah ee la ansixiyay 2012 ma aha oo keliya qoraal siyaasadeed, balse waa xeer nidaaminaya sida loo beddeli karo naftiisa. Sidaa darteed, wax-ka-beddel kasta oo lagu sameeyo dastuurka waa in uu si buuxda u waafaqaa habraacyada iyo shuruudaha uu dastuurku laftiisu dhigayo.

Dastuurka ku-meel-gaarka ah wuxuu si cad u qeexayaa habka dib-u-eegista iyo wax-ka-beddelka, gaar ahaan cutubka 15aad ee ka hadlaya habraaca dhammaystirka iyo wax-ka-beddelka dastuurka. Cutubkani wuxuu dhigayaa nidaam sharci oo dhowr marxaladood leh, kuwaas oo ay ka mid yihiin diyaarinta wax-ka-beddelka, wadatashi qaran, iyo ugu dambayn ansixin ay sameeyaan xildhibaannada baarlamaanka federaalka iyadoo la buuxinayo tirada codadka ee dastuurku farayo.

Si kastaba ha ahaatee, geeddi-socodkii lagu ansixiyay wax-ka-beddelka dastuurka ee dhawaan la soo afmeeray waxaa si weyn loogu dhaliilay in uusan buuxin shuruudahaas. Sida la xaqiijiyay, codbixintii lagu ansixiyay wax-ka-beddelka dastuurka ma aysan gaarin tirada sharciga ahayd ee dastuurku farayo (kooram) marka la samaynayo wax-ka-beddel taabanaya qodobbada aasaasiga ah ee nidaamka dowladnimada.

Arrinta kale ee khilaafka dhalisay waa doorka dowladaha xubnaha ka ah federaalka ee geeddi-socodkan. Dastuurka ku-meel-gaarka ah wuxuu si cad u qeexayaa in qodobbada la xiriira qaabka federaalka iyo amniga qaranka aysan noqon karin kuwo lagu beddelo qaab hal dhinac ah oo ay sameyso dowladda federaalka.

Tani waxaa si gaar ah loogu caddeeyay qodobka 142aad, farqaddiisa labaad, oo sheegaysa in aan wax-ka-beddel lagu samayn karin qodobbada la xiriira federaalka iyo arrimaha amniga iyadoo aan lala tashan dowladaha xubnaha ka ah federaalka. Si kale haddii loo dhigo, dastuurku wuxuu dhisay mabda' ah in arrimaha qaab-dhismeedka federaalka ay yihiin arrimo wadaag ah oo u baahan heshiis siyaasadeed oo ka dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladnimada.

Haddaba marka la eego sida loo maray habraaca wax-ka-beddelka, waxaa muuqata in dowladaha xubnaha ka ah federaalka aysan si buuxda uga qayb qaadan geeddi-socodkaas, taas oo ka dhalisay su'aal sharciyeed oo muhiim ah: ma suuragal baa in wax-ka-beddel lagu sameeyo qodobbada federaalka iyadoo aan la fulin shuruudihii dastuurku dhigey?

Dastuurku ma aha oo keliya xeer nidaamiya dowladnimada, balse waa heshiis bulsho (social contract) oo lagu dhisay nidaamka dowladeed ee Soomaaliya kadib burburkii iyo dagaalladii sokeeye. Dal kasoo kabanaya khilaafyo qoto dheer, dastuurku wuxuu noqdaa aalad lagu dhiso kalsooni siyaasadeed iyo heshiis qaran oo ay wada aqbalaan dhammaan qaybaha bulshada iyo dowlad-dhiska.

Sidaas darteed, hab kasta oo wax-ka-beddel lagu sameeyo dastuurka oo ka leexda habraacyadii uu dastuurku dhigay wuxuu halis gelin karaa mabda'a heshiiska qaran ee dastuurku ku dhisanyahay. Qodobbada ugu muranka badan ee dastuurka—gaar ahaan kuwa la xiriira qaabka federaalka iyo qaybsiga awoodaha—haddii lagu beddelo hab aan ku dhisnayn wadatashi qaran iyo habraac sharci, waxay dhalin kartaa khilaaf siyaasadeed oo sii fogeeya isku-raaca qaran ee dastuurka markii hore loogu talaggalay in uu dhiso.

## DOODDA PUNTLAND EE QAABKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Inkasta oo uusan jirin qoraal rasmi ah oo si toos ah uga soo baxay Dawladda Puntland, haddana aragtideeda waxaa si cad looga dheehan karaa dareenka shacabka iyo khudbadaha madaxdeeda, taas oo ku dhisan saddex mabda' oo waaweyn. Mabda'a koowaad waa in nidaamka federaalka Soomaaliya noqdo mid hoos ka soo dhisma, oo maamullada gobolladu marka hore ka heshiiyaan qaabka federaalka ay rabaan, halkii uu ka ahaan lahaa nidaam kor laga soo dejiyey. Mabda'a labaadna waa in federaalku noqdo nidaam awoodda ugu badan lagu siiyo maamul goboleedyada, halka dowladda dhexe ku koobnaato arrimaha guud ee qaranka, maadaama waayo-aragnimada dowlad dhexe oo aad u xooggan ay dalka u horseeday burbur iyo khilaaf. Mabda'a saddexaadna waa in dowladnimada Soomaaliya lagu dhiso wadar oggol (consensus) oo aan cidna laga reebin, iyadoo la tixgelinayo in dalka uu kasoo baxay dagaal sokeeye oo weli u baahan dib-u-heshiisiin qaran oo dhab ah.

Hadda doodda aan halkaan kusoo bandhigayo waa mid ku dhisan dheehasho aan ka dheehday sadexdaas mabda'a ee ay Dawladda Puntland iyo shacabkeeduba u taaganyihiin. Xaqiijintoodana ay wax badan ku waayeen.

**1. Wadaagga iyo Astaynta Awoodaha (Power Sharing)**

Mid ka mid ah arrimaha ugu muhiimsan ee doodda Puntland waa sida awoodaha dowladeed loo qaybiyay. Aragtida shacabka Puntland waxay qabtaa in nidaamka federaalka saxda ahi uu ku dhisanyahay mabda'a ah in awoodda dowladeed ka bilaabato maamul goboleedyada, halka dowlad dhexe ay qaadato oo keliya awoodaha qaran ee wadaagga ah.

Qaabka ay Puntland u aragto mid sax ah waa nidaam ay maamul goboleedyadu yeeshaan awood ballaaran oo ku filan maamulka gudaha sida adeegyada bulshada, maamulka dhulka, iyo siyaasadaha horumarinta deegaanka. Dowladda federaalka waxay ku ekaanaysaa hawlaha qaran sida difaaca, siyaasadda dibadda, lacagta qaranka, iyo ilaalinta midnimada dalka.

Aragtidan waxay ku salaysantahay mabda'a baahinta awoodaha (decentralization of authority), kaas oo ka mid ah tiirarka ugu muhiimsan ee nidaamyada federaalka ee dunida.

**2. Wadaagga Khayraadka (Resource Sharing)**

Arrinta khayraadka dabiiciga ah waa mid ka mid ah qodobbada ugu muranka badan ee ku jira doodda federaalka Soomaaliya. Aragtida Puntland waxay ku qotontaa in khayraadka dabiiciga ah uu yahay hanti ay wada leeyihiin shacabka Soomaaliya, balse maamulka iyo maaraynta khayraadkaasi ay tahay in ay ka bilaabato maamul goboleedka uu khayraadku dhex ceegaago.

Qaabka ay Puntland u aragto mid sax ah waa nidaam ay maamul goboleedyadu maamulaan khayraadka laga helo gobolladooda, kadibna boqolley heshiis lagu yahay ay la wadaagaan dowladda federaalka iyo maamullada kale.

Qaabkan waxaa lagu yaqaan cilmiga federaalka magaca resource federalism, waxaana laga helaa dalal federaal ah sida Canada, halkaas oo gobolladu ay leeyihiin awood ballaaran oo ku saabsan maamulka khayraadka dabiiciga ah.

**3. Nidaamka Maaliyadda (Fiscal Federalism)**

Nidaamka maaliyadeed ee federaalka sidoo kale waa qodob muhiim ah oo ka mid ah doodda Puntland. Aragtida shacabka Puntland waxay

qabtaa in nidaamka dhaqaalaha federaalka uu ku dhisnaado mabda'a fiscal federalism, iyadoo dakhliga iyo canshuuraha badankood ay ururinayaan maamul goboleedyada, ayna Dowladda Federaalka helayso boqolley lagu heshiiyay si ay ugu shaqeyso hawlaha qaran sida difaaca iyo diblomaasiyadda.

Nidaamkan wuxuu abuurayaa federaal ay maamul goboleedyadu noqdaan saldhigga dhaqaalaha dowladnimada, taas oo yaraynaysa awood ururinsiga dowladda dhexe iyo ku tiirsanaanta maaliyadeed.

**4. Naqshadda Amniga iyo Ciidanka**

Arrinta amniga waa qodob kale oo muhiim u ah doodda federaalka ee Puntland. Aragtida shacabka Puntland waxay qabtaa in amniga gudaha uu noqdo awood maamul goboleed.

Taasi waxay ka dhigan tahay in ciidamada boliiska, ciidamada Daraawiishta iyo hay'adaha amniga gudaha ay noqdaan kuwo ay maamul goboleedyadu maamulaan.

Dowladda federaalka waxay mas'uul ka noqoneysaa ciidanka militariga qaranka oo keliya, kaas oo u xilsaaran difaaca dalka iyo ilaalinta xuduudaha.

Qaabkan waxaa lagu yaqaan dual security structure, waxaana laga helaa nidaamyada federaalka sida Maraykanka.

**5. Hannaanka Garsoorka (Judicial Federalism)**

Garsoorka federaalka sidoo kale waa arrin ay Puntland ka leedahay aragti cad. Nidaamka ay Puntland u aragto mid sax ah wuxuu ku dhisanyahay Garsoor Federaal ah (Judicial Federalism), kaas oo ka kooban laba heer oo garsoor oo madax-bannaan.

Maxkamadaha maamul goboleedyadu waxay qaadaan dhammaan dacwadaha gudaha ee gobolka, halka maxkamadda sare ee federaalka ay qaaddo oo keliya dacwadaha u dhexeeya maamul goboleedyada ama kuwa u dhexeeya federaalka iyo gobollada.

Maxkamadda dastuuriga ah ee federaalka waxay qaaddaa dacwadaha la xiriira fasiraadda dastuurka federaalka iyo ilaalinta in hay'adaha dowladdu ay ku shaqeeyaan si waafaqsan dastuurka.

**6. Astaynta Awoodaha Heerarka Dawladda**

Aragtida shacabka Puntland waxay qabtaa in nidaamka federaalka uu noqdo mid si cad u qeexa awoodaha heerarka kala duwan ee dowladnimada.

Qaabka ay Puntland u aragto mid sax ah waa nidaam ay maamul goboleedyadu yeeshaan awoodaha maamulka gudaha, halka dowladda federaalka ay qaadato awoodaha qaran ee wadaagga ah.

Qaabkan wuxuu ku dhisan yahay mabda'a subsidiarity, oo sheegaya in hawl kasta lagu qabto heerka ugu dhow muwaadinka.

**7. Somaliland**

Mid ka mid ah arrimaha siyaasadeed ee weli saameynaya qaabka federaalka Soomaaliya waa xaaladda Somaliland. Puntland waxay qabtaa in arrinta Somaliland ay tahay arrin qaran oo u baahan xal siyaasadeed oo wadatashi ku dhisan.

Aragtida Puntland waxay tilmaamaysaa in qaabka federaalka Soomaaliya uu noqdo mid awood u leh inuu soo jiito dhammaan qaybaha dalka, si loo helo nidaam dowladeed oo ay ku wada qanacsan yihiin dhammaan dhinacyadu.

**8. Maqaamka Caasimadda**

Maqaamka caasimadda federaalka sidoo kale waa qodob ka mid ah doodda federaalka. Aragtida Puntland waxay qabtaa in caasimadda dalka ay noqoto magaalo leh maqaam gaar ah oo ka madaxbannaan maamul goboleedyada.

Qaabkaas waxaa lagu yaqaan federal capital territory, waxaana laga helaa dalal federaal ah sida Maraykanka iyo Australia.

Ujeeddada qaabkan waa in caasimadda dalka ay noqoto magaalo u taagan dhammaan shacabka dalka, kana madax-bannaan tartanka siyaasadeed ee maamul goboleedyada.

## TALOOYIN IYO DHALIIL SIYAASADEED

Marka la eego xaaladda maanta taagan, shacabka Puntland waxaa horyaalla laba masuuliyadood: mid ku saabsan mustaqbalka federaalka Soomaaliya iyo mid ku saabsan hoggaanka Puntland laftiisa.

Marka hore, shacabka Puntland waa in ay si cad u qeexaan aragtidooda ku saabsan federaalka Soomaaliya. Federaalka ay doonayaan waa inuu noqdaa nidaam ku dhisan Bottom-Up Federalism, Fiscal Federalism iyo Decentralized Governance. Taasi waxay u baahantahay dood siyaasadeed oo mideysan oo ka timaadda bulshada Puntland.

Marka labaad, hoggaanka Puntland maanta jira waxaa saaran masuuliyad weyn oo ku saabsan ilaalinta danaha shacabka. Dhaliisha ugu weyn ee maanta la maqlo waxay tahay in dawladda Puntland aysan si ku filan u difaacin mowqifka shacabka marka la gaaray marxaladda wax-ka-beddelka dastuurka.

Dad badan oo Puntland ah waxay qabaan in Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni uu ka gaabiyey masuuliyaddaas, isla markaana himiladiisu ay u muuqato mid ku jihaysan tartanka siyaasadda heer federaal iyo hamigiisa xilka madaxweynaha Soomaaliya, halkii uu ka hormarin lahaa ilaalinta mowqifka Puntland ee ku saabsan nidaamka federaalka.

Sidaa darteed, doodda maanta ka taagan dastuurka Soomaaliya ma aha oo keliya dood sharci. Waa dood ku saabsan mustaqbalka federaalka, awood qaybsiga iyo jihada siyaasadeed ee Soomaaliya. Shacabka Puntland waxay aaminsanyihiin in haddii federaalka Soomaaliya uu sii jiri doono, waa inuu noqdaa nidaam si dhab ah ugu dhisan mabda'a ah in dawladnimadu ka bilaabato maamullada.

Ugu dambayn, arrinta dastuurka Soomaaliya kuma filna in Puntland ay ku ekaato weero guud sida "waan diidnay", "waan qaadacnay", ama "ma aqbalayno." Diidmo keliya ma dhisto aragti siyaasadeed oo qaran. Sidaa darteed, aniga oo ku hadlaya dareenka kumannaan aqoonyahan iyo shacab reer Puntland ah, waxaan u jeedinayaa Dawladda Puntland in ay si cad oo cilmi ku dhisan uga jawaabto doodaha dastuurka ee maanta taagan.

Waxaa muhiim ah in la magacaabo guddi aqoonyahanno iyo khubaro dastuur (Constitutional Experts) ah oo daraaseeya qodobbada khilaafka leh, kadibna soo saara warqad cilmiyaysan (Policy Paper) oo si cad u qeexaysa aragtida Puntland: waxa ay diidantahay, sababta ay u diidantahay, iyo nidaamka federaal ee ay doonayso.

Warqaddaas waa in loo gudbiyaa Baarlamaanka Puntland si uu u meel mariyo, una noqoto mowqif rasmi ah oo Puntland ku wajahdo dhammaan doodaha mustaqbalka ee la xiriira dhammaystirka Dastuurka Federaalka Soomaaliya. Taasi waxay sidoo kale ka dhigaysaa aragtida Puntland mid joogto ah oo ay ku shaqeeyaan xukuumadaha mustaqbalka.

Haddii Puntland aamusnaato oo aanay si cad u sheegin waxa ay diidantahay iyo waxa ay rabto, waxaa dhici karta in bulshada Soomaaliyeed ay u aragto in Puntland ay tahay maamul aan si cad u garanayn waxa uu doonayo, balse keliya ka hor istaaga kuwa kale waxa ay rabaan. Sidaa darteed, waxaa lama huraan ah in aragtida Puntland lagu muujiyo dood sharci iyo cilmi ku dhisan oo cad.

**W/Q:** Zakaria Xaaji Axmed Iley "Rabiica"



# MAXAY SOOMAALIYA U SAAQIDAY?

## FALANQAYN KU SAABSAN ASALKA COLAADAHA SOOMAALIYA



Cabdullaahi Cabdi
(Cabdullaahi Dheere)



**Xigashada Sawirka**: Villa Somalia

## HORDHAC

Su'aasha ah "Soomaaliya maxay u saaqiday?" ma aha oo keliya su'aal ku saabsan burbur dawladeed; waa su'aal ku saabsan taariikh, hayb, dhaqaale, iyo qaab-dhismeedka awoodda.

Waxaa jira aragtiyo kala duwan oo isku dayay inay sharxaan sababta colaaduhu dalal badan oo Afrikaan ah—gaar ahaan Soomaaliya—u noqdeen kuwo daba dheeraaday. Qaar waxay ku doodayaan in dhibku yahay qaab-dhismeed bulsho oo qabiil ku dhisan; qaar kale waxay eedda dusha ka saaraan gumaysigii iyo xuduudihii uu ka tegay; halka kuwo saddexaad ay arrinta u rogeen xisaab dhaqaale iyo fursad (political economy).

## ARAGTIDA 1AAD: MAQNAANSHAHA AWOOD-GURI SIYAASADEED

Aragtida ugu horreysa, oo tan ugu caansan, waxay ku doodaysaa in aysan jirin awood-guri siyaasadeed oo si dabiici ah uga hanaqaaday guud ahaan Afrika madow, gaar ahaan Soomaaliya. Haddii ay jirtayna, waxay ahayd mid dibadda ka timid, sida ay qabto aragtida daraasadda Afrika Galbeed (Hamitic hypothesis).

Sida aragtidan qabto, bilowgii iyo soo ifbixii sharciga iyo kala-dambaynta (law and order) ee Soomaaliya waa mid la kowsatay waqtigii isticmaarka (colonial period). Aragtidan waxay sidoo kale sheegaysaa in dagaallada sokeeye ay ka dhasheen xorriyadda oo si dhaqso ah loo siiyay; sidaas darteed, waxaa habboonaan lahayd in isticmaarku sii joogo oo shaqadiisa dhammeysto (colonialism ended too soon).

Si gaar ah marka loo eego Soomaaliya, aragtidaas waxaa calanka u sida aqoonyahanno ay ka mid yihiin I. M. Lewis, Enrico Cerulli, iyo Said Sheikh Samatar, kuwaas oo ku tilmaamay bulshada Soomaaliyeed mid ku dhisan qabiil reer-guuraa ah, oo aan lahayn dawlad dhexe oo taariikhi ah.

I. M. Lewis (1961). A Pastoral Democracy: Wuxuu ku tilmaamay bulshada Soomaaliyeed: "Bulshada Soomaalidu waa segmentary lineage system (qabiil ku dhisan nasab)."

Enrico Cerulli (1957). Somalia: Scritti vari editi ed inediti. Isaguna wuxuu yiri:

"Nidaamka siyaasadeed ee Soomaalida wuxuu ahaa acephalous society (bulsho aan madax dhexe lahayn)."

Said S. Samatar (1982). Oral Poetry and Somali Nationalism: The Case of Sayyid Mahammad 'Abdille Hasan. Wuxuu isna adkeeyey doorka qabiilka, isagoo sheegay: "Qabiilku waa qaab-dhismeedka ugu muhiimsan ee bulshada."

Sida aragtidan qabto, colaadaha maanta jira waxaa asal u ah khilaafaad qabiil oo hore u jiray—farqiga keliya ayaa ah in warmo iyo fallaaro lagu beddelay hub casri ah, kaas oo khasaaraha badiyay.

Haddii la rabo in Soomaaliya nidaam dawladeed loo sameeyo, aragtidan waxay ku talinaysaa in hayb qabiil ku dhisan lagu saleeyo, awooddana si waafaqsan loogu qaybsado.

## DOOD KA HOR IMANAYSA ARAGTIDAN

Inkastoo qabiilku qayb weyn ka yahay qaab-dhismeedka bulshada Soomaaliyeed, marka si qoto dheer loo eego taariikhda, sawirku wuu ka duwanyahay. Qarniyadii dhexe iyo kuwii ka dambeeyay, Soomaaliya iyo Geeska Afrika waxaa ka jiray nidaamyo siyaasadeed oo maxali ah, si wanaagsan u abaabulnaa, sida Saldanadda Ajuran, Saldanadda Adal, Saldanadda Geledi iyo Saldanadda Warsangeli).

Maamuladani waxay lahaayeen:

- Nidaam canshuur ururin
- Ciidan abaabulan
- Maamul dhuleed
- Xiriir diblomaasiyadeed

Tani waxay muujinaysaa in awood-guri siyaasadeed ay jirtay, inkastoo aysan qaab ahaan la mid ahayn dawladaha Westphalian-ka ee Yurub, oo u hanaqaaday si xoog iyo ismaquunin ku dhisan iyo xuduud astaysan oo xiran. Sidaas darteed, cabbiridda taariikhda Soomaaliyeed iyadoo la adeegsanayo hal halbeeg oo reer Yurub ah waxay dhalin kartaa gunaanad qalloocan.

Marka laga yimaado sultanadaha, bulshada Soomaaliyeed waxay lahayd nidaam sharci oo laba tiir ku dhisnaa:

1. Xeer–heshiisyo bulsho oo nidaamiya xallinta khilaafaadka, magdhawga, iyo ilaalinta nabadda.

2. Shareecada Islaamka–nidaam diini ah oo culimo iyo qaadiyo ku dhaqmi jireen.

Isku darka labadan nidaam wuxuu abuuray hannaan sharci oo awood qaybsan, laguna xalliyo khilaafaadka iyada oo aan dawlad dhexe oo xooggan jirin. Tani ma ahayn fowdo; waxay ahayd qaab dawladnimo kala duwan.

## ARAGTIDA 2AAD: RAADKII UU ISTICMAARKU KA TAGAY

Aragtida kale waxay sheegaysaa in raadkii isticmaarku (colonial legacy) uu udub-dhexaad u yahay mushkiladda qaaradda ku habsatay, taas oo ay Soomaaliya qayb ka tahay.

Gumeysigu wuxuu Afrika ka sameeyay mashruuc siyaasadeed oo ku dhisnaa kala qaybin bulsho. Xuduudo cusub ayaa la sameeyay, dad iyo deegaanno ayaa la kala jaray, waxaana la dhisay qaab maamul oo ku dhisan "tribal homelands" ama deegaanno qabiil lagu asteeyay. Nidaamkan ayaa abuuray maamulayaal qabiil oo loo xilsaaray inay bulshada xukumaan, taas oo keentay in qabiilku noqdo unug siyaasadeed oo maamul.

Isticmaarku waxa uu burburiyay hidihii, dhaqankii iyo hoggaankii soo jireenka ahaa ee bulshadu lahayd, isagoo abuuray hoggaan isaga ku xiran. Markii xorriyadda la qaatayna wuxuu ka tagay muran dhul, hayb iyo diin ku salaysan oo ilaa maanta aan xal loo helin.

Colaadihii dhexmaray Soomaaliya iyo dalalka deriska la ah sida Itoobiya iyo Kenya waxay salka ku hayaan qaybintii isticmaarka ee gayiga Soomaaliyeed, taas oo horseeday burburkii dawladnimadii Soomaaliyeed. Kiiska Somaliland waxa uu salka ku hayaa xuduuddii Anglo-Italian Agreement iyo doodda ku saabsan in lagu noqdo xuduuddii uu isticmaarkii Ingiriiska ka tagay ee British Somaliland.

Hanaanka federaalaynta Soomaaliya qudheedu kama marna xuduudo hayb ku dhisan.

Intaa waxaa dheer, gumeysigu wuxuu keenay nidaam siyaasadeed iyo maamul oo aad uga fog hidaha, dhaqanka, iyo qaabkii bulshada Soomaaliyeed isu maamuli jirtay. Nidaamkan cusub ee dawladnimo, oo aan si buuxda ula jaanqaadin hab-dhaqankii iyo xeerarkii bulshada, ayaa sababay jaahwareer iyo faham darro ku saabsan sida dawladnimada loo dhiso iyo sida bulshada loo maamulo.

Aragtidan waxaa si weyn u taageera aqoonyahanno ay ka mid yihiin Prof. Ali Mazrui, oo ku falanqeeyay taxanihiisa The Africans: A Triple Heritage, iyo Prof. Mahmood Mamdani, oo buuggiisa Citizen and Subject ku sharxay sida gumeysigu u abuuray nidaam bulsho oo kala qaybinaya muwaadiniinta iyo bulshada miyiga.

Waxaa kale oo wax badan ka qoray raadkii uu isticmaarku ka tagay iyo sida ay saamayn ugu yeesheen colaadaha Soomaaliya Prof. Ahmed Ismail Samatar iyo Abdi Ismail Samatar.

Si kasaba ha ahaatee, marka la eego dhismaha bulshada Soomaaliyeed, waxaa jira arrin kale oo muhiim ah: dadka Soomaaliyeed waxay wadaagaan waxyaabo badan oo ka badan inta ay ku kala duwan yihiin. Waxaa ka dhexeeya af, diin, dhaqan, taariikh, iyo qaab nololeed aad isugu dhow. Arrimahan ayaa ka dhigay bulshada Soomaaliyeed mid ka mid ah bulshooyinka Afrika ee ugu midaysan marka laga eego dhinaca aqoonsiga qaran.

AUN Prof. Axmed Ashkir Botaan ayaa qaba dood la mid ah:

"Ma jirto cid inkiri karta in qabiilku ama qabyaaladdu ay qarniyo badan ahayd saldhigga nidaamka bulsho ee Soomaalida, isla markaana ay qayb weyn ka ahayd dhaqanka Soomaalida. Laakiin nooca qabyaalad ee hadda ka aloosan Soomaaliya wax shaqo ah kuma laha dhaqan qabyaaladeedkii hore ee Soomaalida, kaas oo u taagnaa laba arrimood oo waaweyn:

- Is-dugsi: Qabiilku wuxuu xubnaha u dhashay ka difaaci jiray haddii dibadda laga soo weeraro, wuxuuna kaalmo hiil iyo hooba ah u geysan jiray dadka u dhashay marka ay dhibaato ama baahi la soo gudboonaato.
- Is-aqoonsi: Dadka Soomaalida ah aqlabiyaddoodu waxay ku tiirsan tahay dhaqashada xoolaha iyo guurguurida joogtada ah. Maaddaama qofka Soomaaliga ahi uusan lahayn warqad aqoonsi ama degaan rasmi ah, jidka keliya ee lagu aqoonsan karo waa in uu abtirsado oo uu sheego qabiilka uu u dhashay, taas oo ka dhigan warqaddiisa aqoonsiga oo lagu garanayo."

Halkaas ayay su'aasha muhiimka ahi ka dhalanaysaa: ma keentaa kala duwanaanshaha abtirsiimada qabiilku kala duwanaansho fikir iyo kala qaybsanaan siyaasadeed?

Abtirsiimadu waa qaab bulsho oo dadka ku mideeya asal iyo nasab wadaag, laakiin si dabiici ah uma dhaliso aragtiyo siyaasadeed oo kala duwan. Xitaa hal qabiil gudaheed waxaa laga heli karaa fikrado siyaasadeed oo kala duwan. Sidaa darteed, kala duwanaanshaha haybtu lafteedu ma aha sabab toos ah oo dhalisa kala qaybsanaan siyaasadeed.

Marka aragtida ah in hayb kastaa xuduud gaar ah yeelato waa fufkii mashruucii isticmaarka, waana waxa hortaagan in la dhiso aragti ku dhisan qaran Soomaaliyeed oo salka ku haysa sidii loo heli lahaa mabda'a muwaadiniin Soomaaliyeed oo u siman xuquuqda iyo waajibaadka.

## ARAGTIDA 3AAD: DHAQAALAHA SIYAASADEED (POLITICAL ECONOMY)

### Asalka iyo Mabda'a Aragtiyeed

Bartamihii sagaashamaadkii (1990-meeyadii), waxaa si weyn u soo ifbaxay aragti cusub oo lagu falanqeeyo colaadaha sokeeye, taas oo loo yaqaan political economy ama mararka qaar lagu tilmaamo Rationalist models of civil war. Aragtidan waxay si toos ah uga hortimid aragtiyihii hore ee ku salaysnaa in dagaallada sokeeye ay inta badan ka dhashaan kala qaybsanaan hayb, sida qabiil, diin, ama cadaalad darro siyaasadeed. Halkii ay taas xoogga saari lahayd, aragtidan cusub waxay ku doodaysaa in colaadaha sokeeye si weyn ugu xidhan yihiin danaha dhaqaale iyo go'aanno caqli ku dhisan oo ay qaataan shakhsiyaadku.

Cilmi-baarayaal ay ka mid yihiin Paul Collier iyo Anke Hoeffler ayaa hormuud u ahaa horumarinta aragtidan, iyagoo sameeyay daraasado tirakoob ku salaysan oo daboolaya dagaallo sokeeye oo dhacay intii u dhexaysay 1969 ilaa 1999. Daraasado kale oo ay sameeyeen James Fearon iyo David Latin ayaa iyaguna sii xoojiyay natiijooyinkan. Su'aasha ugu weyn ee ay isweydiiyeen waxay ahayd: maxaa qofka ku riixa inuu ku biiro jabhad ama koox hubaysan?

Jawaabta ay heleen waxay ahayd mid ku salaysan mabda'a "rational choice", taas oo macnaheedu yahay in qofku sameeyo go'aan ku dhisan xisaab faa'iido iyo khasaaro. Qofku wuxuu qiimeeyaa waxa uu ka heli karo haddii uu ku biiro jabhad—sida dhaqaale, awood, ama badbaado—iyo waxa uu lumin karo haddii uu ku biiro. Haddii faa'iidada la filayo ay ka badato khasaaraha, waxaa kordha suurtagalnimada inuu qofku ku biiro koox hubaysan. Sidaas darteed, dagaalka sokeeye waxaa loo arkaa natiijo ka dhalata go'aanno shakhsiyeed oo isku biiray.

### Saameynta Dhaqaalaha, Khayraadka, iyo Dowlad Daciif ah

Si ay u fahmaan waxa keena colaadaha, cilmi-baarayaashu waxay falanqeeyeen doorsoomayaal dhowr ah oo ay ka mid yihiin tirada dadka, heerka dhaqaalaha (GDP), khayraadka dabiiciga ah, iyo awoodda dowladeed. Natiijooyinka ugu muhiimsan ee ay heleen ayaa muujinaya in kobaca dhaqaale ee dal leeyahay uu si weyn u yareeyo khatarta dagaal sokeeye. Sababta ayaa ah in marka dhaqaalaha kobco, ay bataan fursadaha shaqo iyo nolol, taas oo kordhisa qiimaha "fursadda la lumiyo" (opportunity cost) ee dagaal gelidda. Qofka haysta shaqo iyo dakhli joogto ah ayaa ka laba-labaynaya inuu halis geliyo noloshiisa si uu ugu biiro jabhad.

Dhanka kale, aragtidan waxay muujisay in dalalka ku tiirsan khayraadka dabiiciga ah, gaar ahaan badeecadaha aasaasiga ah sida macdanta, beeraha, ama xoolaha, ay u nugul yihiin dagaallo sokeeye. Tani waxay ka dhalataa laba arrimood: marka hore, khayraadkani waxay siiyaan jabhadaha ilo dhaqaale oo ay isku maalgeliyaan; marka labaadna, ku tiirsanaanta khayraadkaas waxay badanaa keentaa dowlad daciif ah oo aan awoodin inay si buuxda u xakameyso dalka. Sidaa darteed, marka dowladdu daciif tahay, waxaa sahlan in kooxo hubaysan ay soo baxaan oo ay sii fidaan.

Intaa waxaa dheer, aragtidan waxay soo bandhigtay dood caan ah oo ah “greed versus grievance”. Dooddani waxay sheegaysaa in “damaca danaha dhaqaale” (greed) ay inta badan ka muhiimsan yihiin “cabashooyinka” (grievance) sida dulmiga ama cadaalad darrada. Inkasta oo kooxaha hubaysan ay mararka qaar sheegtaan inay u dagaallamayaan cadaalad, aragtidani waxay tilmaamaysaa in dhab ahaantii ay badanaa ka dambeeyaan dano dhaqaale, sida xakamaynta khayraadka ama helitaanka dakhli joogto ah.

Si kastaba ha ahaatee, aragtidan ma aha mid aan la dhaliilin. Qaar ka mid ah aqoonyahannada ayaa ku doodaya in ay si xad-dhaaf ah u yarayso doorka aqoonsiga bulshada sida qabiilka iyo diinta, kuwaas oo door weyn ka ciyaara colaado badan. Sidoo kale, waxaa la sheegaa in dadka mar walba aysan ku dhaqmin go’aan caqli ku dhisan, maadaama dareenno sida aargoosi, cabsi, iyo nacayb ay si xooggan u saameeyaan go’aannada. Intaa waxaa dheer, qaar ayaa aaminsan in aragtidan ay dhayalsanayso cabashooyinka dhabta ah ee ka dhasha dulmiga siyaasadeed iyo maamul xumada.

## GABAGABO

Soomaaliya waxaa u saaqiday isku dhafka arrimo taariikhi, gumeysi, qabiil, iyo dhaqaale. Inkastoo hayb qabiil iyo nidaam dhaqameed hore u jireen, raadkii gumeysigu iyo danaha dhaqaale ayaa colaadaha sokeeye sii xoojiyay. Dhismaha hay’ado dawli ah oo caddaalad ku dhisan, oo ka turjumaya bulshada iyo mabda’a muwaadiniinta, ayaa ah furaha xasillooni iyo horumar waara. Fahamka isku dhafka ah ee arrimahan ayaa jid u ah Soomaaliya mid mideysan oo nabad ku nool.







# SHAHAADO MISE XIRFAD? XAQIIQADA SUUQA SHAQADA EE ARDAYDA SOOMAALIYEED



Abdirahman Mohamud Said




Xigashada Sawirka: AI

# 1. HORDHAC

Waxbarashadu waa aasaaska ugu muhiimsan ee horumarka bulshada iyo kobaca dhaqaalaha. Dal kasta oo doonaya horumar waara wuxuu si weyn u horumariyaa nidaamka waxbarashada si uu u soo saaro jiil leh aqoon, xirfad iyo karti ay ku wajahaan caqabadaha casriga ah. Soomaaliya, gaar ahaan dhalinyarada ardayda ah dhexdooda, waxaa isa soo taraysa dood muhiim ah oo ku saabsan su'aasha ah in guusha mustaqbalka ay ku xirantahay shahaado jaamacadeed ama xirfad qofku kasbado.

Sanadihii u dambeeyay tirada jaamacadaha iyo ardayda ka qalin jabisa jaamacadaha Soomaaliya si weyn ayay u kordheen. Si kastaba ha ahaatee, kororka tirada qalinjabiyayaasha ma lahan had iyo jeer xiriir toos ah suuqa shaqada. Arday badan oo shahaado haysta ayaa weli la kulma caqabado ku saabsan shaqo la'aan ama shaqo aan la jaan qaadi karin aqoontooda. Arrintani waxay dhalisay su'aalo ku saabsan in nidaamka waxbarashada jaamacadeed uu si dhab ah u diyaarinayo ardayda si ay ugu shaqeeyaan suuqa shaqada.

# 2. SOO BANDHIGIDDA FALANQAYNTA XOG ARUURIN AAN SAMEEYAY

Sahan aan sameeyay oo diiradda saaraysa aragtida ardayda Soomaaliyeed ee ku saabsan muhiimada shahaadada jaamacadeed iyo xirfadah, sidoo kalena baaraysa inay jaamacaduhu bixiyaan xirfadaha ay ardaydu u baahanyihiin, iyo sidoo kale noocyada xirfadaha ay ardaydu u arkaan inay ka maqanyihiin nidaamka waxbarashada ayaan kusoo bandhigayaa qormadan. Ujeeddada maqaalku waa in la falanqeeyo jawaababha la bixiyay si loo fahmo baahida dhabta ah ee ardayda, isla markaana loo soo jeediyo jaamacadaha talooyin wax ku ool ah oo gacan ka geysan kara horumarinta waxbarashada iyo diyaarinta ardayda mustaqbalka shaqo.

Sahanka waxaa lagu sameeyay sahamin ay ka qayb galeen arday hadda jaamacadaa dhigta iyo kuwo qalinjebiyay, waxaana la weydiiyay saddex su'aalood oo la xiriira waxbarashada jaamacadeed iyo xirfadaha shaqo. Jawaabaha ay bixiyeen waxaa lagu soo bandhigay qaab jaantus ah si loo fududeeyo fahamka natiijooyinka.

Su'aasha koowaad ee daraasadda waxay ahayd: "Shahaado jaamacadeed mise xirfad: maxay ardayda Soomaaliyeed u baahanyihiin?" Jawaabaha la bixiyay waxay muujinayaan saddex aragti oo kala duwan, kuwaas oo kala ah shahaado jaamacadeed, xirfad shaqo, iyo isku darka labadaba.




*Figure 1:jaantus-kaan waa pie chart muujinaya doorashada ka qaybgalayaasha.*

Falanqaynta jaantusku wuxuu muujinayaa in 56.3% ka mid ah ka qaybgalayaasha ay aaminsanyihiin in labadaba shahaado iyo xirfad ay muhiim yihiin, 31.3% waxay qabaan in xirfadda shaqo ay tahay tan ugu muhiimsan, halka 12.5% oo keliya ay u arkaan in shahaado jaamacadeed ay tahay tan ugu muhiimsan.

Natiijadani waxay muujinaysaa isbeddel ku yimid fikirka ardayda, maadaama inta badan ay hadda fahamsanyihiin in aqoonta aragtiyeed ee jaamacadda iyo xirfadaha la taaban karo ay si wadajir ah u dhammaystiraan midba midka kale. Ardaydu waxay u arkaan shahaadada inay bixiso aqoon guud iyo faham cilmiyeed, halka xirfaddu ay bixiso awoodda lagu dabaqi karo aqoontaasi xaaladaha shaqo ee dhabta ah.

Su'aasha labaad ee daraasadda waxay ahayd: "Xirfadda ardaygu u baahan yahay ma ka heli karaa jaamacadda?" Su'aashan waxay muhiim u tahay fahamka sida ardaydu u qiimeeyaan nidaamka waxbarashada jaamacadeed.





*Figure 2:Jaantuskan waa pie chart muujinaya jawaabaha haa iyo maya*

Natiijooyinka jaantuska waxay muujinayaan in 62.5% ka mid ah ka qaybgalayaasha ay aaminsanyihiin in jaamacadaha aysan si buuxda u bixin xirfadaha ay ardaydu u baahanyihiin, halka 37.5% ay qabaan in jaamacaduhu bixiyaan xirfado muhiim ah.

Tani waxay muujinaysaa caqabad ka jirta nidaamka waxbarashada, taas oo ah farqiga u dhexeeya aqoonta aragtiyeed iyo xirfadaha shaqo. Jaamacado badan ayaa weli xoogga saaraya casharro iyo imtixaano, halka ay yaraato fursadaha tababarka gacanta laga qabto, shaqo-barashada, ama khibradda shaqo ee dhabta ah. Sidaas darteed arday badan ayaa qalin jabiya iyagoo aan si buuxda ugu diyaar garoobin suuqa shaqada.

Su'aasha saddexaad ee xog aruurinta waxay ahayd: "Maxay yihiin xirfadaha ka maqan oo ay u baahanyihiin ardayda Soomaaliyeed?"




*Figure 3: Jaantuskaan waa pie chart muujinaya noocyada xirfadaha*

Falanqaynta jaantuska waxay muujinaysaa in 56.3% ka mid ah ka qaybgalayaasha ay tilmaameen in ardaydu u baahanyihiin xirfado shaqo oo la taaban karo iyo xirfadaha tiknooloojiyadda. Inta kale waxay tilmaameen "soft skills" sida wada xiriirka wax ku oolkaa "effective communication skills" iyo hoggaaminta, halka qayb kale ay xuseen xirfado kale oo kala duwan.

Natiijadani waxay muujinaysaa in ardaydu u arkaan xirfadaha tiknooloojiyadda iyo kuwa shaqada la xiriira inay yihiin kuwa ugu muhiimsan ee ka maqan nidaamka waxbarashada. Dunida maanta oo si weyn ugu tiirsan tiknooloojiyadda, xirfadaha sida isticmaalka kombiyuutarka, falanqaynta xogta, iyo adeegsiga qalabka digital-ka ayaa noqday kuwo lama

huraan ah.

# 3. TALO SOO JEEDIN

Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka falanqaynta xogtii la qaaday, waxaa muuqata in nidaamka waxbarashada uu u baahanyahay horumar lagu xoojinayo xirfadaha ardayda. Jaamacadaha waa inay isku daraan aqoonta aragtiyeed iyo tababarka shaqo si ardaydu u helaan khibrad dhab ah inta ay waxbarashada ku jiraan. Tani waxay ka caawin kartaa ardayda inay si fudud ugu gudbaan nolosha shaqo marka ay qalinjabiyaan.

Sidoo kale waxaa muhiim ah in jaamacaduhu ay xoogga saaraan horumarinta xirfadaha shakhsiyeed sida hoggaaminta, iyo shaqa kooxeed. Xirfadahani waxay muhiim u yihiin shaqo kasta, maadaama shaqooyinka casriga ah badankood ay ku saleysanyihiin wada shaqeyn iyo xiriir bulsho.

Intaa waxaa dheer, jaamacadaha waa inay kordhiyaan barashada tiknooloojiyadda iyo xirfadaha digital-ka si ardaydu ula jaan qaadaan isbeddelka dunida. Iskaashi dhow oo u dhexeeya jaamacadaha iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ayaa sidoo kale muhiim u ah abuurista fursado shaqo-barasho iyo tababar.

Ugu danbayn xogtaan kooban oo la aruuriyay waxay muujisay in ardayda Soomaaliyeed ay si cad u fahmeen muhiimada ay leedahay isku darka shahaado jaamacadeed iyo xirfado shaqo. Inkasta oo shahaadadu ay muhiim u tahay aqoonta iyo horumarka shaqsiga, haddana xirfadaha la taaban karo ayaa door weyn ka ciyaara helitaanka shaqo iyo guusha mustaqbalka.

Natiijooyinka sahanka ayaa sidoo kale muujiyay in arday badan ay aaminsanyihiin in jaamacadaha aysan weli si buuxda u bixin xirfadaha ay u baahanyihiin. Sidaas darteed waxaa muhiim ah in nidaamka waxbarashada lagu daro barnaamijyo tababar, shaqo-barasho, iyo horumarinta xirfadaha tiknooloojiyadda.

Gabagabadii, horumarinta waxbarashada iyo xirfadaha ardayda Soomaaliyeed waa tallaabo muhiim ah oo lagu dhisi karo mustaqbal leh aqoon, hal-abuur iyo shaqo abuur.

**Qore:** Abdirahman Mohamud Said



# **SOOMAALIYA:** HABDHAQANKA MADAXDA SIYAASADDU MA BURBURIN DAWLADNIMAA MISE DAWLAD DHIS?




Axmex Siciid
Aw-nuur




**Xigashada Sawirka**: AI

## HORDHAC

Dhismaha dawladdu waxa uu ku salaysan yahaysalaysanyahay ku dhaqanka sharciga, dhisidda hay'ado dawladeed oo tayo leh oo bixiya adeegyo bulsho, iyo jiritaanka hay'ado loo wada siman yahay (inclusive institutions) oo aan u adeegin dano gaar ah sida kuwa ku dhisan ka faa'iidaysi (extractive institutions). Waxa kale oo muhiim u ah la dagaallanka musuqmaasuqa, wada-tashi joogto ah, iyo xallinta khilaafaadka iyadoo loo marayo wadahadal iyo is-qancinta. Intaas waxaa dheer, wadaninimada iyo horumarinta danta guud oo laga hormariyo danta gaarka ah ayaa laf-dhabar u ah dawladnimada. Guud ahaan, dawlad-wanaaggu waa tiirka ugu muhiimsan ee horumarinta dawladnimada, qaybihiisuna waa kuwa aan kor ku soo xusnay. Haddaba, bal si qoto dheer uga fiirso arrimahaas iyo halka ay maanta Soomaalidu ka taagan tahay.

Qormooyin hore oo aan ku daabacay Majaladda Marag ayaan kaga hadalnay sababaha siyaasadda Soomaalida ay u saldhigan la'dahay, taariikhda ay soo martay dowladnimada Soomaaliyeed iyo caqabadihii sababay in ay burburaan. Haddaba qormadaan waxaan ku falaanqayn doonaa kaalinta habdhaqanka madaxda siyaasadda ee Soomaaliyeed ay ku leedahay dib u dhaca iyo horumar la'aanta dawladnimada Soomaaliyeed.

## XADGUDUBKA SHARCIGA

Ku dhaqanka sharciga macnihiisu waxa weeye in sharcigu qabto si siman dhammaan muwaadiniiinta kuwa xilka haya iyo shacabka caadiga ah labaduba waa u simanyihiin sharciga. Markii ku dhaqanka sharciga lagu xadgudbo dawladnimada awoodeeda ayaa aad hoos ugu dhacda sida hay'adaha dawladda oo noqda kuwo karti xumo iyo awood la'aan la soo gudboonaato sida maxkamadaha, booliiska, dhamaan hay'adaha dhaqangelinta sharcigu waxay noqdaan kuwa aan fulin ujeedadii loo dhisay.

Hoggaamiyayaasha siyaasadda iyo danleyda ku xeeran waxay saameyn taban ku yeeshaan go'aamada hay'adaha u xilsaaran dhaqan-gelinta sharciga. Waa xaqiiq in madaxda Soomaaliyeed, kuwa ku kala sugan heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, dhammaantood aysan ixtiraamin sharciga, gaar ahaan marka ay xukunka raadinayaan iyo marka ay xukunka yimaadaan labadaba.

Xukunka waxay ku raadiyaan sifo aan sharci ahayn, sida bixinta laaluush iyo adeegsiga qabyaaladda, iyagoo ka faa'iidaysanaya dareenka u dabacsanaanta qabyaaladda ee shacabka Soomaaliyeed oo wacyigoodu hooseeyo. Sidoo kale, ma xaq-dhowraan sharciga, ixtiraamna uma hayaan. Waxay cod dheer ku sheegaan dhaliisha iyo xumaanta madaxda ay doonayaan inay xukunka ka beddelaan, laakiin marka ay xukunka yimaadaan, waxay sameeyaan wixii ay ku dhaliilayeen madaxdii ka horreysay.

Haddaba, waa maxay sababtu? Jawaabtu waa fududahay: ujeeddada siyaasadda ay ka leeyihiin waa dan shakhsi ah oo keliya, mana laha ajende qaran. Sidaas darteed, dantooda ayay ka arkaan in wixii ay shalay diidanayeen ay maanta sax u arkaan.

Markay xukunka yimaadaanna, waxay hoos u dhigaan kaalinta hay'adaha cadaaladda, sida awoodsiinta guddiga maamulka garsoorka, guddiga doorashooyinka, dhismaha maxkamadaha dastuuriga ah, iyo guud ahaan madax-bannaanida garsoorka, si garsoorku u noqdo mid ay si toos ah iyo si dadban labadaba u maamulaan, oo uusan u noqon garsoor madax-bannaan oo hawlihiisa si madaxbannaan u guta, isla markaana dheellitira dowladda oo ku ilaaliya sharciga. Soomaaliya kama jiro garsoor ka madax-bannaan labada heer ee dowladeed labadaba; taas macnaheedu waxa weeye in madaxda Soomaaliyeed ee labada heer dowladeed ay ka siman yihiin hoos u dhigista awoodaha garsoorka.

Ku xadgudubka sharciga ee ay muddo dheer sameynayeen hoggaamiyeyaasha Soomaaliyeed wuxuu sababay in dalka ay ka hanaqaadaan hay'ado dowladeed oo tabar daran, kuwaas oo aan shacabka kalsooni ku qabin. Waxa kale oo uu horseeday musuqmaasuq baahsan oo aan lahayn isla xisaabtan dhab ah. Kheyraadkii loo adeegsan lahaa horumarka dalka ayaa siyaabo kala duwan loo leexsaday ama loogu tagri falay. Sidoo kale, dhaqaalaha dalka iyo horumarkiisuba si weyn ayay u wiiqmeen, maadaama maalgashadayaashu marka hore eegaan jiritaanka ku dhaqanka sharciga iyo fulinta heshiisyada sharciyeed. Maalgashadayaashu waxay ka cabsadaan in Soomaaliya loogu geysto xoogsheegasho ama loola dhaqmo si aan caddaalad ahayn, sababtoo ah dalka kama jiro nidaam sharci oo si dhab ah loo dhowro loona dhaqan geliyo.

## HESHIIS LA'AANTA IYO KHILAAFKA JOOGTA AH

Dadka Soomaaliyeed waxay la dhibaataysan yihiin, ama dawladnimada Soomaaliyeed ay la hirgeli la'dahay, khilaafka joogtada ah ee u dhexeeya madaxda Soomaaliyeed, gaar ahaan khilaafka hadda caado iska noqday ee afartii sano kasta, xilliyada doorashada, lagu abuuro muran iyo khilaaf ku salaysan dano siyaasadeed oo gaar ah. Sidoo kale, waxay ku heshiin la'yihiin qaabka dawladnimada Soomaaliyeed iyo habka xukunka loo wadaagi ama loo kala yeelan karo marka laga hadlayo labada heer ee dowladeed.

Bal dib u eeg 12-kii sano ee la soo dhaafay: dastuurkii lagu heshiiyey lama dhaqan gelin, haddana mid aan la hubin in lagu dhaqmi doono ayaa lagu muransan yahay.

Sidoo kale, afartii sano kasta waxaa soo noqnoqda muran doorasho oo leh dhibaatooyin isku mid ah.

Siyaasiga madaxda ka ah heer federaal ama heer maamul-goboleed waxaa caado u ah inuu siyaasadda ku jaangooyo dantiisa siyaasadeed ee shakhsi ahaaneed, isagoo dhaawacaya ama meel uga dhacaya danta guud ee dalka. Wuxuu isku dayaa inuu siyaasaddiisa ku qotonta dan gaar ah si jujuub ah ku meel mariyo, isla markaana inta kale ku qasbo. Halkii ay ahayd in siyaasadda lagu hago nidaam ku salaysan wada-tashi, wada-hadal, is-qancin iyo isu-tanaasul (bal dib u fiiri wixii ka dhacay heer federaal iyo heer maamul-goboleed tobankii sano ee u dambaysay).

Madaxda siyaasadda ee maanta joogta iyo kooxda u shaqaysa waxay doorbidaan inay ka leexdaan mabaadi'daas xallinta khilaafaadka, iyagoo adeegsanaya siyaasad ku dhisan "aan jiirno oo jujuubno, kana adkaanno cidda inaga soo horjeeda." Waxaase la soo tijaabiyey in Soomaalidu ku kala adkaan karin xoog iyo xeelad midna; balse wada-hadalka iyo is-qancinta ay u badan tahay inay isku fahmi karaan, haddii hab niyad-sami ah oo cilmiyeysan loo maamulo wada-hadallada xallinta khilaafaadka siyaasadda ku salaysan.

## KOBCINTA MUSUQMAASUQA

Musuqmaasuqa waa kansarka dawladnimada; meel ay ka jiraan noocyadiisa kala duwan, isla markaana aanay hay'adihii u xilsaarnaa ka shaqayn la dagaallankiisa, waxaa la dhihi karaa dawladnimo kama jirto. Musuqmaasuqa noocyadiisa kala duwan wuxuu Soomaaliya ka noqday wax caadi ah. Xilliyada doorashada, laaluushka la kala qaataa wuxuu noqday arrin caadi ah, xataa shacabkuna way aamineen in qofkii aan lacag bixin karin xilliga doorashada uusan ahayn qof xil loo dooran karo. Laaluushku siyaasadda Soomaaliya, gaar ahaan xilliyada doorashada, wuxuu ka noqday arrin aan ceeb ahayn, oo qofka madaxnimada raadinaya codka lagu iibsado.

Marka xukunka lagu yimaado hab laaluush ku dhisan, waxaa xiga in qofka sidaas ku noqday madax uu ka shaqeeyo sidii uu inta uu xilka hayo u xoolaysan lahaa, isaga oo aan wax xil ah iska saarin ilaalinta hantida ummadda iyo ka hortagga musuqmaasuqa iyo xatooyada. Soomaaliya, labadeeda heer ee dowladeed, kama jiro hanti-dhowr madax-bannaan oo si dhab ah u ilaaliya hantida dadweynaha, ama guddi la dagaallanka musuqmaasuqa oo si hufnaan iyo karti leh u guta waajibaadkiisa, kana madax-bannaan Madaxweynaha heer federaal ama heer maamul-goboleed.

Sidoo kale, eexda iyo qaraabakiilku waxay inta badan ka dhacaan shaqaalaysiinta hay'adaha dowladda, iyadoo aan shaqooyinka dowladda lagu bixin u-qalmid (merit-based), isla markaana aan muwaadiniinta fursad loo siin inay shaqada dowladda u galaan tartan furan si qofkii mudnaa uu u helo shaqada, dalkiisana ugu adeego. Intaa waxaa dheer, shaqaalaha dowladda waxaa lagu qaybiyaa qaab qabiil iyo nidaamka 4.5, oo markii hore xal loo biday in lagu soo xulo xilalka siyaasadda, balse hadda lagu dabaqo xitaa shaqaalaha dowladda. Taas waxay keentay in hay'adihii dowladda ay noqdaan kuwo aan lahayn karti iyo waxqabad, maadaama aan loo xulin shaqaale ku habboon, balse lagu saleeyo musuqmaasuq.

## U-DABACSANAANTA SHISHEEYAHA

Waxaa sidoo kale caado noqotay ku xirnaanta iyo u dabacsanaanta shisheeyaha; madaxda Soomaaliyeed inta badan waxay u tagaan dowlado shisheeye iyagoo weydiista lacag ay doorashada ku musuqmaasuqaan, taas beddelkeedana waxay ka ballanqaadaan inay danaha dowladahaas ka shaqayn doonaan marka ay xukunka yimaadaan. Bal qiyaas marka ay dowlad shisheeye ka codsadaan kharash si ay dalka Soomaaliya madax uga noqdaan, dowladaasuna ka aqbasho; waa iska cadahay waxa qofkaas noqonayo iyo waxa uu ku soo kordhin karo xaaladda cakiran ee umadda Soomaaliyeed. Dabcan, wuxuu noqonayaa qof u shaqeeya dano shisheeye, mana noqonayo qof danaha ummadda Soomaaliyeed ka shaqayn kara ama ku dhiiran kara inuu xaaladda adag ka saaro.

## KU TAGRIFALKA AWOODDA

Madaxda hadda joogta ee labada heer ee dowladda Soomaaliyeed waxay ka siman yihiin inay ku takri-falaan awoodda dowladnimo, sida ku dhaqmi la'aanta dastuurka heer federaal iyo heer maamul-goboleed, hirgelin la'aanta nidaam dowladeed oo ku dhisan halbeegyada dowlad-wanaagga sida isla xisaabtanka, ku dhaqanka sharciga, kartida iyo hufnaanta, wada-tashiga, iyo xallinta khilaafaadka oo ku salaysan nidaam wada-hadal iyo is-qancin. Shan sano kasta in lagu murmo doorashada waa tusaale muujinaya ku takri-falka awoodda ee madaxda Soomaaliyeed, karti-xumada iyo awood la'aanta hay'adaha garsoorka, gaar ahaan maqnaanshaha maxkamadda dastuuriga ah oo aan ka jirin heer federaal, halka maamul-goboleedyada qaarkood ay magac ahaan uga jirto oo keliya. Isla xisaabtan la'aantaasi waxay fursad u siisaa madaxda Soomaaliyeed inay u dhaqmaan sida ay rabaan, iyaga oo aan ka baqayn sharci iyo shacab toona.

## KOBCINTA DANTA GAARKA AH

Danta gaarka ah oo laga hormariyo danta guud waa dhibaato weyn oo haysata dawladnimada Soomaaliyeed. Madaxda Soomaaliyeed ee kala jooga labada heer ee dowladeed waxay siyaasadda iyo dowladnimada u fahansan yihiin inay danahooda

gaarka ah u adeegsadaan, iyagoo hoos u dhigaya danta guud ama aan xil weyn iska saarin. Taasi waxay keentay in dowladnimadu noqoto mid lagu qaabeeyo danaha madaxda iyo inta ku xeeran, isla markaana loo adeegsado, halkii shacabka loogu adeegi lahaa. Waddaniyadda iyo horumarka dalka-na sidii la rabay looma shaqeeyo.

Adeegsiga danta gaarka ahi waa tan keentay in ilaa iyo hadda lagu guulaysan waayo dastuur la isku raacsan yahay, iyo dhismaha ciidamo Soomaaliyeed oo loo wada dhan yahay. Sidoo kale, waxay sababtay in aan lagu guulaysan in dalka laga xoreeyo cadowga, lana nabadeeyo oo la isku xiro, halkii la kala qoqobi lahaa. Adeegsiga danta gaarka ahi waa tan keentay in la curyaamiyo hay'adaha ilaalinta sharciga, sida maxkamadda dastuuriga ah iyo guud ahaan hay'adaha garsoorka.

Sidoo kale, waxay wiiqday hay'adaha ilaalinta maaliyadda, sida xisaabiyaha guud iyo hantidhowraha guud. Adeegsiga danta gaarka ahi waa tan keentay dhismaha guddiyo doorasho oo aan loo dhammayn, isla markaana aan shaqadooda u madax-bannaanayn, taas oo horseedday muran doorasho oo joogto ah oo soo noqnoqda afartii sano kasta.

Adeegsiga danta gaarka ahi waa tan keentay in lagu takri-falo hantida dadweynaha, isla xisaabtan la'aan darteed. Dowladda Soomaaliyeed, labadeeda heer, waxay noqdeen kuwo karti daran oo aan shacabka Soomaaliyeed siin karin noocyada adeegyada ay dowladdu tahay inay bixiso, sida adeegyada amniga, caafimaadka, waxbarashada, biyaha nadiifta ah, yareynta faqriga, iyo kordhinta dakhliga shacabka si noloshoodu u hagaagto, dowladduna uga hesho cashuur ay ku fuliso hawlaha laga sugayo.

## GABAGABO – WAA MAXAY XALKU?

Soomaaliya waxay u baahan tahay hoggaamiye ka hufan waxyaabaha aan kor ku soo sheegnay, oo ku dhaqanka sharciga hirgeliya, kana bilaaba naftiisa iyo xafiiskiisa, kuna dadaala dhismaha hay'adaha dowladeed ee u adeega dadka Soomaaliyeed, kana saara mushkiladda kala qoqobnaanta iyo kalsooni xumada dalka iyo dadka Soomaaliyeed. Sidoo kale, waa inuu ambaqaadaa nidaam dib-u-heshiisiin ku dhisan wada-hadal iyo is-qancin, kana fogaada inuu dowlado shisheeye lacag uga soo qaato si uu xukun ku gaaro, balse lagu doorto kalsoonida ay siiyaan dadka Soomaaliyeed.

Hoggaamiye hirgeliya dastuur lagu heshiis yahay, oo ku dhisan wada-hadal iyo is-qancin, isla markaana si hab la isku waafaqsan yahay loogu shaqeeyo; wax ka qabta musuqmaasuqa iyo ku takri-falka awoodda dowladnimo; hirgeliya dowladnimo saldhig u ah nidaamka dowlad-wanaagga iyo maamul-wanaagga (good governance).

Hoggaamiye hirgeliya hay'ado dowladeed oo ku dhisan karti iyo hufnaan, leh shaqaale lagu soo xulay tartan iyo ku habboonaanta shaqada (merit-based), hay'adahaas oo dadka Soomaaliyeed siiya adeegyada ay u baahan yihiin (public service delivery). Hay'ado dowladeed oo dadku kalsooni ku qabaan, dadkana si siman ugu adeega (inclusive institutions), kuwaas oo beddel u noqda hay'adaha dowladeed ee hadda magac ahaan u jira, balse aan lahayn karti iyo awood ay dadka Soomaaliyeed ugu adeegaan; kuwaas oo ah hay'ado dano gaar ah loogu shaqaysto (extractive institutions).


Su'aasha la isweydiin karaa waxa weeye: dadka Soomaaliyeed ma u diyaarsan yihiin inay si xorriyad ah u doortaan hoggaamiye leh sifooyinka aan kor ku soo sheegnay? Ma u diyaarsan yihiin inay fahmaan dhibka ay ku hayaan dawladnimada kuwa maanta madaxda ka ah dalka qaybihiisa kala duwan? Dantooda ma garanayaan mise qabqablayaasha siyaasadda ayay khaanado ugu kala xiran yihiin? Waqti intee le'eg ayayse ku qaadan doontaa dadka Soomaaliyeed inay gaaraan bisayl iyo wacyi ay iska dulqaadaan silica iyo dhibka ay badeen kuwa maanta madaxda ka ah dawladnimada Soomaaliyeed heerarkeeda kala duwan?

Si xorriyad ah ma u xulan karaan ama ma u dooran karaan hoggaamiyaha maanta Soomaaliya u baahan tahay inuu dhibaatada ka saaro, isagoo Ilaahay kaashanaya? Mise waxay ku sii jiri doonaan dhibkaas ay Soomaaliya ku rideen qabqablayaasha siyaasadeed, oo sababi kara mustaqbalka in dalka Soomaaliyeed uu shisheeye qaab isticmaar casri ah u kala qaybsado, iyagoo u maraya kuwa maanta madaxda sheeganaya?

Dhammaan su'aalahaas kor ku xusan iyo kuwo kaleba waxay horyaallaan inay ka jawaabaan waxgaradka, aqoonyahanka, culimada, dhalinyarada, iyo haweenka Soomaaliyeed, dhammaantood, gobol kasta oo ay ku nool yihiin. Taariikhda ayaa inoo sheegi doonta halka Soomaaliya ku dambayn doonto haddii aan dadkeedu isdaba qaban.

**W/Q:** Axmed Siciid Awnuur

# AQOONYAHANKA IYO DAREENKA BULSHADA SOOMAALIYEED



Dr. Maxamed Cali Faarax



## HORDHAC:

"Daftarka iyo qalimada kuwaan ugu dadaaleeyney
Dambiilahana lagusoo korshiyo kimista duuduuban
Kuma diirsan daynkiina ma gudin duma laysaguye
Oo dib u heshiisiinta qaran uma dadaalaane"

Diiwaanka Abshir Bacadle

Kalmadda "Aqoon" sida uu tilmaamayo Qaamuuska Af-soomaaliga ee uu qoray Cabdalla Mansuur waa: "Cilmi, Garasho dheeraad ah oo wax loo leeyahay. Tus. Jaamac Xamar aqoon buu u leeyahay". Haddaba; aqoontu waa fahan, waa dariiq nolosha qofka u iftiimiya, garasho dheeraad ahna ka siiya waxa sida gaarka ah uu u bartay.

Sidoo kale Cabdalla Mansuur waxa uu yiri: "Aqoonyahan waa qofka aqoontiisa cilmiyeed sarrayso". Aqoonyahan waa qof wax bartay oo aqoon gaarana u yeeshay cilmi gaara oo waxtar u yeesha bulshada. Waxa uu noqon karaa dhakhtar, sharciyaqaan, dhaqaale-yahan, khabiir diimeed, siyaasadda iyo culuumta kale ee jirta nolosha aadanahana hore loogu mariyo.

Aqoonyahanku maaha qofka waxbarta oo ku xeeldheeraada takhasus gaar ah oo keliya; balse waa qof waxbartay sida uu Dr. Zaki Najiib tilmaamayna xambaarsan fikrad uu wax uga beddelayo xaaladda bulshadiisu ay ku jirto, nolol iyo horumarna u horseeda. Aqoonyahanku maaha qofka aqoontiisa ku kooba naftiisa, ku raadsada waxtar u gaar ah, ku abuurta sumcad iyo dhaqaale, balse waa qof u nool bulshadiisa, cilmigiisa iyo garashadiisana ugu adeega, ku dadaala inuu wacyigooda iyo dareenkooda sare u qaado, ku baraarujiya xuquuqdooda, jeclaysiiya dalkooda, kuna tirtirsiinaya inay ilaashadaan wadajirkooda iyo dadnimadooda.

Aqoonyahanku waa qofka ay dad badan oo bulshada ka mid ahi kaga daydaan aqoontiisa iyo kartidiisa inay gaaraan si ay ugu faa'ideeyaan bulshada, waxa markaas looga baahanyahay in aqoonyahanku yahay mid ka hufan qabyaaladda iyo kala soocidda bulshada, si uu bulshada inteeda kale ugu noqdo hormuud ay ku daydaan kartidiisa iyo waxqabadkiisa. Aqoonayahanku waa lafdhabarta bulshada, waana kuwa ay dunidu ku kala horumartay. Ummad kasta oo dunida bur-bur iyo dhibaato ku habsatana waxaa bad-baadiya aqoonyahankeeda, waxgaradkeeda iyo da'yarteeda oo ah dadka ay bulsho kastaa ku faanto.

Qormadaan, waxaan ku iftiiminayaa aqoonyahanka Soomaaliyeed, xaaladda uu ku suganyahay, doorka ay bulshadiisu ka sugayso iyo sida uu u gabay horseednimadii laga dhowrayay, waxaan kusoo bandhigayaa talooyin aan u soo jeedinayo aqoonyahanka Soomaaliyeed si ay fadhiga uga kacaan, dibna isugu noqdaan.

## XAALADDA AQOONYAHANKA SOOMAALIYEED

Dr. Maxamed Daahir Afrax oo sifaynaya aqoonyahanka Soomaaliyeed wuxuu yiri: Soomaaliya way ka jirtaa tacliinley (Aqoonyahan), hase yeeshee ma jirto cid lagu magacaabi karo "garwadeenka fekerka" lehna jiritaan muuqda. Ma haysano maskax-maal indheer-garad ah oo hoggaamiya habka ay u fekerto bulsha-weynta Soomaaliyeed. Tacliinleyda ayaa ah kooxdii laga filayay inay kaalintaas buuxiso, hase yeeshee way ka gaabisay. Koox ahaan iyo qof-qof ahaanba way yeelan kari weydey karti iyo bisayl ay ku noqoto gar-wadeen shicib-weynaha wacyigiisa hoggaamiya, waddada toosanna u tilmaama, khataraha uga diga, mustaqbalka sii saadaaliya, siyaasiga la dooda, qudhooda wacyi-geliya ama waxbara, marin habowgana uga diga.

Aqoonyahanka ama tacliinleyda Soomaalida waa lagu hungoobay, waxayna safka hore kaga jiraan inta ummaddani ka gablantay. Kaalintaas aan bannaynay ayaa u suurtagelisey qabqab-layaasha siyaasadda iyo qabyaalad wadeenka in ay ku keliyaystaan hoggaaminta habka bulshadu u fekerto, in ay ku guulaystaan beerista dhaqan-siyaasadeed sumaysan: inay maandooriyaan wacyiga dadka, taasina keento in la marin-habaabo oo middiyaha la isku afaysto halkii laga shaqayn lahaa horumar looga qaybgalo tartanka quruumaha dunida qarniga 21-aad.

Waa sidaas Dr. Afrax uu sheegaye, aoonyahanka Soomaalidu wuxuu qayb ka noqday dhaqan-siyaasadeedka gurracan ee bulshada Soomaaliyeed lagu burburiyey, halkii loo baahnaa inuu bulshada garab-istaago, dhinaceeda kasoo jeesto, una iftiimiyo dabinnada loo maleegayo iyo siyaasadaha gurracan ee lagula dhaqmayo.

## KAALINTA LAGA SUGAYO AQOONYAHANKA SOOMAALIYEED

Aqoonyahan waxaa lagu tilmaami karaa oo keliya ruuxii ficil ku muujiya inuu yahay indheer-garad maskaxdiisu cilmi iyo awoodba u leedahay inay curiso fikrado ummadda u gudba aqoonna ku kordhiya.

Waa qalad qof kasta oo shahaado sita in uu isku magacaabo ama isu qaato “aqoonyahan”.

Waxa waajib ah in qofkasta oo aqoonyahan ah uu ka soo baxo doorkii lagu yaqaanay aqoonyahanka ee xaga horumarka bulshada iyo ka shaqaynta midnimada, inkastoo ay jiraan maanta kumanaan aqoonyahanno Soomaaliyeed oo dunida dacalladeeda ku kala baahsan; balse aanay maanta jirin wax midnimo ah oo ka dhaxaysa aqoonyahanka Soomaalida meel kasta oo ay joogaan, waxaa la oran karaa waxay gabeen kaalintoodii ay ku lahaayeen bulshada iyo horumarka dalka iyo dadka. Laakiin waxaa loo baahanyahay aqoonyahan dhab ah oo dadkiisa iyo dalkiisaba wax tara, ugana faa’ideeye aqoontii uu soo bartay bulshada. Waa inuu yahay mid buuxiya kaalinta uu ku leeyahay bulshadiisa una tafaxayta sidii uu isagu uga qayb qaadan lahaa horumarka bulshada, hormuudna ugu noqon lahaa midaynta aqoonyahanka iyo bulshada inteeda kale. Aqoonyahan kasta waa inuu ka sheqeeyo midnimada, Horumarka, sare u qaadidda wacyiga iyo wax wada qabsiga bulshada si meel looga soo wada jeesto dhibaatooyinka dhaqaale, amni iyo siyaasadeed ee bulshada haysta loona gaaro horumar waara oo bulshadu ku naalooto.

Shacabka Soomaaliyeed waxay noqdeen maato caano leh, dad dayacan oo aan la xisaabtamayn aqoonyahan iyo siyaasi midnaba, dad aan damiir lahayn, xumaanta ka dhiidhiyin, wacyigoodu aad u hooseeyo, xuquuqdooda aan garanayn, siyaasi ma naxe ahi hadba meeshuu rabo u jiheeyo, dhib kasta oo soo gaarana aan wax damqasho iyo dareen ah muujinayn, waakan Dr. Afrax oo Soomaalida xaaladdeeda ku matalay laba wiil: (wiil habaaran) oo ah damiir laawayaasha gacanta ku dhigay awoodda siyaasadeed iyo tan dhaqaale ee dalka, awooddaas oo ay si aan xishood lahayn ugu adeegsadeen dano shakhsi ah oo aan waarayn, kuna burburiyeen danihii ummadda ee ay kitaabka u mareen ilaalintooda.

Qolada labaad (wiilka doqonka ah) waa shacbiga caadiga ah oo garan kari waayey in ay meel uga soo wada jeestaan, iska qabtaan ama ugu yaraan ka daba haraan kuwaas ubadkooda aaya tiraya. Waxaa lagu sakhraamiyey beer-laxawsi qabiil oo hal nin oo dhagar-qabe ah dantiisa gaaban ku fushanayo waqti kooban, inta kalena uu ka dhiganayo xaabo uu dabka ku shito.

Nooca aqoonyahanka ay bulshada Soomaaliyeed u baahantahay

Hadaba; qofka aqoonyahanka ah waxa lagarabaa inuu wax badan ka beddelo bulshada uu la noolyahay:

1. Aqoonyahanku waa inuu yahay qof Muslim ah, ku dhaqma diinta Islaamka, yaqaanna waxa u xalaala iyo waxa ka xaaraana, ku dadaala gudashada Salaadda, Soonka, Sakada iyo wixii Rabbi faray oo dhan, kana fogaada waxyaabaha Alle ka xarrimay oo dhan.
2. Aqoonyahan qadariya dhaqanka soo-jireenka ah ee Ummadda Soomaaliyeed, aqoonyahan ay ku wayntahay waxbadan oo dhaqanka Soomaaliyeed huwan yahay oo ay ka mid yihiin, waddan jacayl, deeqsinimo, marti soor, gaadiid celis, xoola gooyo, dhibaad, lahaanshaha gaar ahaaneed, daacadnimo, is qaddarin iyo wadanoolaasho, hawlkarnimo iyo suugaan jaceyl.
3. Aqoonyahan la jaanqaadaya ka-qaybgalka aqoonta iyo tiknooloojiyada adduunyada horumartay, tacliintu, haba lagu kala horumarsanaadee waa dhaxal dadyoowga adduunka ka dhexeeya, ummad walibana rabto inay hanato si ay dadkeeda ugu diyaariso nolol fiican iyo barwaaqo.
4. Waa inuu yahay qof xambaarsan fikrad, wixii uu bartayna uga faa’ideeya bulshada dhinac walba ay tahayba, waayo waxa uu wax u bartay waa dadkiisa iyo dalkiisa; laakiin maaha inuu yahay qof dadka u sheegta aqoonyahan, kuna raadiya magac iyo sumcad u gaar ah oo aan waxba u soo kordhinayn bulshada uu la nool yahay.
5. Aqoonyahanku waa inuu bulshada ku dhiiri-geliyaa midnimada, wadajirka, waddan jacaylka, wax wada-qabsiga iyo horumarka, kana fogyahay qabyaaladda, musuqa, nin jeclaysiga, eexda iyo dhammaan falalka gurracan ee bulshada kala gaynaya, horumarkoodana dhantaalaya.
6. Qofkasta oo aqoonyahan ah waxa laga rabaa inuu ogaado inay maanta tahay maalintii aqoonyahanka lagu baxsan lahaa, kana shaqeeyo sidii uu dalku ku gaari lahaa xasillooni siyaasadeed, koboc dhaqaale, amni sugan, iyo adeeg bulsho oo la gaarsiiyo goob kastaba; iyagoo maskaxda ku haya inay yihiin cidda toosin karta qallooca galay siyaasadda dalka, xakamayn karta siyaasiga bahaloobay, sarena u qaadi karta wacyiga bulshada si ay uga dhiidhido xumaha iyo falalka gurracan ee loo maleegayo.
7. Aqoonyahanku waa inuu dareensanyahay masuuliyadda kaga aaddan dadkiisa iyo

dalkiisaba, ogaadaana in Alle kula xisaabtami doono wixii uu bartay hadduusan uga faa'idayn bulshada, waajibka saaranna uusan gudan. Waxaynu ognahay in maanta bulsho kasta oo dunida ku nooli ay ku horumartay aqoonyahanno u dadaalaya sidii dadkooda iyo dalkooda ay u gaarsiin lahaayeen dayaxa guudkiisa iyo meesha sare ee ay higsanayaan.

## GUNAANAD

Soomaaliya waxaa soo gaaray bur-bur ay la nooshahay muddo ku dhow afartameeyo sano, kaasoo saameeyey nolosha qof kasta oo Soomaali ah dhinacyada; siyaasadda, dhaqaalaha, amniga, wada-noolaashaha, midnimada iyo isku haynta dalka, iyo ilaalinta madaxbannaanida.

Cid kasta oo Soomaali ah mas'uuliyad baa ka saaran dalkiisa iyo dadkiisa; balse aqoonyahanka Soomaaliyeed waxaa si gaar ah u saaran inuu ka fekero sidii dalka loo badbaadin lahaa, looga saari lahaa xaaladda uu ku jiro ee hubinta la'aanta ah, loona gaarsiin barri-amaan lagu noolaan karo, barwaaqo iyo horumarna lagu gaari karo.

Aqoonyahanka waxaa looga fadhiyaa inuu qaato doorka xakamaynta siyaasiga bahaloobay ee aan dal iyo dad midna dan u hayn, una nool naftiisa iyo inta xigtadiisa ah oo keliya, siyaasiga dabeecadda ay u noqotay musuqa, eexda, qabayaaladda, kala fogaynta iyo kala dilidda bulshada Soomaaliyeed. Aqoonyahanku waa midka u qareema bulshada, danahooda ka shaqeeya, wacyigooda sare u qaada, una tilmaama waxkasta oo dan u ah oo ay ku gaari karaan karaamo iyo nolol wanaagsan.

## MARAAJICDA


1. Annarita Puglielli iyo Cabdalla Cumar Mansuur, Qaamuuska Af-soomaaliga, Roma TrE-Press, 2012.

2. SomaliTalk.com » Doorka Aqoonyahanku ku leeyahay Bulshada. Q/2aad. Qalinkii Suleiman Bashir Omar

3. 2017 زكي نجيب محمود، هموم المثقف،

4. Dr. Afrax, 2010: Dal dad waayey iyo duni damiir beeshay.











# MAXAA WIIQAY KAALINTII BULSHADA RAYADKA EE XOOJINTA ISLA-XISAABTANKA SIYAASADEED EE SOOMAALIYA?



Cabdiraxmaan Shiikhdoon



Xigashada Sawirka: AI

## HORDHAC

Dulucda erayga "bulshada rayidka ah" waa mid mudo badan soo jirey, oo xilligii hore qayb ka ahaa siyaasadda bulshada, hase yeeshee dawladnimada casriga ahi ay ka dhigtay bulshada rayidka ah mid ka madax bannaan hanaanka dawlada, oo leh kaalin kor joogtayn iyo hoga-tusaalayn, sida shaqsiyaadka ama hay'adaha aan dawliga ahayn ee daneeya horumarinta bulshada. Bulshada rayidku waa cumaacunta isku xirta bulshada iyo dawlada, iyada oo dhiirigelinaysa hufnaanta iyo isla-xisaabtanka oo gogol-dhig u ah dawlad wanaagga. Tan iyo shirkii Carta ee curashadii jamhuuriyadii saddexaad ee Soomaaliya, bulshada rayidka ahi, waxay qayb lixaad leh ka qadatay hawlihii dib-u-dhiska dawladihii lagu soo dhisay Carta iyo Embigati. Hase yeeshee muddadaan dambe waxaa muuqata in ay hoos u dhacday kaalintii bulshada rayidka ah ee ka qayb qaadashada hagaajinta dawladnimada, hagida horumarka, xoojinta garaadka iyo garashada bulshada.

Qoraalkani waxa uu si kooban u qaadaa-dhigayaa sababaha wiiqay in bulshadu si guud ama bulshada rayidku ay uga gaabiyaan kaalintoodii, weliba xilligaan oo lagu jiro ee xaalad ay sabaynaso siyaasadda Soomaaliya , uuna jiro hardan adag oo u dhexeeya hogaanka dalka iyo mucaaradka, sidoo kale dawlada faderaalka ah iyo dawlad goboleedyada barkood.

## URURADA BULSHADA IYO ISLA-XISAABTANKA SIYAASADDA

Ururada bulshada waxa ay Soomaaliya si xoogan uga hanqaadeen horaantii 1970-dii, markii ay dawladii kacaanku samaysay ururada haweenka, ururada shaqaalaha, ururada dhallinyarada iyo kuwo kale oo loo aasaasay in ay garwadeen ka noqdaan abaabulka iyo fulinta himilooyinka kacaanka. Uraradaasi waxa ay ahaayeen kuwo si buuxda gacanta ugu jiray dawladii kacaanka, kuwaas oo markasta ka qayb-qaadanay fulinta go'aamada iyo qorshayaasha kacaanka. Kaalinta ugu weyn waxa ay ahayd hawlgelinta dadweyn, mana lahayn awood, karti iyo ku-dhac ay kula xisaabtaan dawladii kacaanka ahyd ee waxaa ay ku dhawaaqi jireen:" Barbaartiyo shaqaalahoo is biirsaday, Barbar taagaan tawradooda, rayigii ka soo baxay". Waxaa muddo dheer dalka Soomaaliya ka shaqaynaya ururada aan dawliga ahayn ee caalimga ah (INGOs), kuwaas oo ilaa iyo maanta ka hawlgala dalka ayaa sahlay curashada ururada maxaliga ah ee aan dawliga ahayn oo shaqo-wadaag la ah ururada caalamiga ah ee aan dawladiga ahayn.

Markii ay burburtay dawladii dhexe ee Soomaaliya(1991), waxaa durbadiiba abaabul bulsho ku aasaasmay ururo bulsho oo isku xirmay, oo waxa ka qabtay adeegyada bulsahda, kuwaas oo u abaabulnaa si ururo aan dawli ahayn (Non-Goverment Organization). Ereyga "Ururada Bulshada" waxa uu Soomaaliya uga muuqadaa sida "Jilayaasha aan Dawliga ahayn-NSA" kuwaas oo ka kooban, ururada aan dawladiga ahayn (NGOs), ururada bulshada (CBO), ururada haweenka, dhallinyarada, saxaafada, xirfadlayda, culimada, ganacsatada, dhaqanka, iwm. Iyada oo laga ambaqaado dadaalkii iyo kaalintii muuqatay ee ay ururada bulshadu si keli keli ah uga qayb-qaadeen, dawlad-dhiska, nabadaynta, adeegyada bulshada, ayaa waxa muqatay in marka la mideeyo awoodooda ay si mug leh wax ka qabtaan horumatinta bulshada iyo hufnaanta siyaasadda. Bulshada caalamka ayaa abaabushay isku xirka ururada bulshada, kuwaas oo loo sameeyey dalado mideeya jilayaasha aan dawliga hayn sida SONSA(Somali Non-State Actors/SOSCENSA), PUNSA(Puntland Non-State Actors), kuwaas oo la aasaasay sannadkii 2008-dii iyo kuwo kale. Ururada bulshada rayidka ah ayaa ku dhex aasaasmay qobqobyadii ka jiray xayndaabka Soomaaliya, taas oo dabartay awoodooda ka baxsan xayndaabyada ay ku jiraan ama keentay in lagu kala aragtida duwanaado siyaasadda dalka ka jirta.

Maadaama ay dawladu (Faderaal ama Dawlad-Goboleed) ay hadda qabato shaqooyin badan oo ay horey gacanta ugu jiray ururada bulshada (haddana ay weli qayb ka qaataan), haddan kaalinta weli u bannaan ururada bulshada rayidka ah waa wax ka qabashada isla-xisaabtanka siyaasadda, iyo xasilinta siyaasadda, kuwaas oo saldhig u ah in ay dawladu noqoto mid degan oo wax ka qaban karta baahida bulshada, oo dawlada lagula xisaabtamo gabood-falyada iyo iska-indho-tirka danta muwaadinka. Sidoo kale, nabadeynta colaadaha bulshada ka jira, kuwaas oo ka dhasha khilaafaadka siyaasadda ama kuwo ku salaysan xiniftinka qabyaaladda. Arrimahaasi maanta waa baahida ugu weyn ee ka jirta Soomaaliya. Kahor inta aan la mideyn ururada bulshada iyo horaantii aasaaska jilayaasha aan dawliga ahayn, kaalinta burshada rayidka ah waxa ay dayax afar iyo tobnaad ahayd oo si dhiiran codkooda ugu cabirayey maaraynta khilaafyada siyaasadda ama colaadaha jiray.

Waxaa jirta dood oranaysa in ururada bulashada loo adeegsado wax ka bedelka siyaasada dawlada bariga iyo dunida saddexaad. Taas oo muujinaysa awooda xoogan ee ururada bulshada ee wax ka bedelka siyaasaddaha dawladaha. Aarintaas, waxaa tusaale u ah isbedelkii ka dhacay wadanka Tajistaan ee ku yaala bartamaha Aasiya, kaas oo horaantii 1990-kii, madaxweynihii dalkaas xukunka looga tuuray kacdoon bulsho oo abaabulan. Marka xagal kale laga eego, arrintaasi waxa ay muujinaysaa awooda bulshada isku duuban oo dan guud higsanaysa.

Dhinac kale, waxyaabaha tusaale oo loogu soo qaadan karo awooda bulshada ee ka dhacay Soomaaliya waxaa ka mid ah: (i) sidii uu kacaanku u abaabulay bulshada ee barnaamijkii iska-wax-u-qabso, kaas oo Soomaaliya ka hirgeliyey hawlo ilaa iyo maanta mirahooda la guranayo, sidii dugsiyadii lagu dhisay iska-wax-u-qabo oo maanta ka shaqaynaya dalka iyo (ii) kacdoonkii shacabka Soomaaliyeed ku taageereen maxkamadaha oo Muqdisho isku furay, kana xoreeyey hogaamiye kooxeedyadii kala qoqobay, in kasta oo mirihii kacdoonka maxkamadaha aan loo maarayn si hagaagsan, haddana, waxay soo afjareen awoodii hogaamiye kooxeedyada. Dhinaca kale, abwaanada ayaa kaalin xoogan ka qaata abaabulka buslahada iyo isla-xisaabtanka dawlada, sida uu abwaankii Hadraawi uu cabirayo tixaha hoose oo aad moodo in uu la hadlayo madaxda maanta joogta:

*Ninkii ballankaaga qaaday*
*Ka baaqday xilkaad u dhiibtay*
*Ka baydhay ujeedadaada*
*Ku boobay adoo sabool ah*
*Ku wiirsaday baaba'aaga*
*Adoo bogan waayey taada*
*Ninkii u buseelay raaxo*
*Huwaday bulbushii libaaxa*
*Buruudkiyo shaashka qaatay*
*U booday cirkaa dusheenna*
*Bilkeeday laboontidiisa*
*Buurtuu koray waarin mayso*

## SABABAHA WIIQAY KAALINTA BULSHADA RAYADKA AH

Marka la tixgeliyo xogaha ay bixiyeen dad waayo-aragnimo iyo aqoon durugsan u leh arrimaha bulshada rayidka, waxaa muuqata dhowr arrimood oo waawyn oo wiiqay awoodii bulshada rayidka ah, gaar ahaan u-qareemida isla-xisaabtanka iyo hufnaanta siyaasada iyo xasiloonida dalka. Arrimahaas waxaa ka mid ah:

1. **Awooda Dawlada:** markii hore ururada aan dawliga ahayn (NGOs) oo ugu xoog badan urarada bulshada rayidka ah, waxa ay xorriyad furan u haysteen mashaariicda ay fuliyaan, oo ma jirin awood dawladeed oo duljoogtay. Cabdi Baafe (Guddoomiyaha Dhaxal-Reeb, khabiir dhinaca ururada bulshada) waxa uu sheegay in ay ururada bulshadu codkoodu uu mideysnaa oo uu cadaa xilligii qabqablayaasha. Awooda dawlada oo xoogsatay ayaa culays ku noqotay xoriyaddii ay ururada aan dawliga ahayn, uga hadli jireen arrimaha siyaasada, madaama si fidud looga qaadi karo ogolaanshaha shaqada, haddii loo arko in ay ka hor imaanayso maslaxda hoggaanka siyaasadda. Waxaa tusaale loo soo qaadan karaa hay'adda SIDRA (Somali Institute for Development Research and Analysis), oo fadhigeedu ahaa Garoowe oo laga joojiyey mashruuc ay waday, taas oo keentay in kalfadhigiisii Oktoober 2025 ee baarlaamka Puntland uu su'aalo weydiiyo wasaaraddii ku shaqo lahayd arrintaas. Baafe waxa uu yiri : "Dhalashada dowladduna waxay keentay in ay dawladu u qaadato in bulshada rayidka ay tahay mid aan waxba ku diidin karin, kana hadli karin siyaasadda, taas oo keentay in ay isla xisaabtanku hoos u dhacdo oo si gaar ah warbahinta loo xanibo, ururada bulshada rayidka ah dhib weyn ayay kala kulmeen dawlada faderaalka iyo dawlad goboleedyada". Dhinaca kale, waxa uu ku doodayaa Faysal Warsame (guddoomiyihii hore ee PUNSA) in hogaanka dawladu uusan ogolayn in lala xisaabtamo ama xog lala wadaago bulshada. Waxa uu intaas ku daray in ay xoogaysatay danta ay ururada rayidku ka leeyihiin dawlada si xil ama dano kale. Waxa kale oo uu yiri: " qabyaalada ayaa keentay in madaxda ururada bulshadu aysan ka hadlin la xisaabtanka siyaasiyiinta hoggaanka haysta ee ay isku haybta yihiin". Waxaa arrintaas tusaale u ah, Prof. Xuseen Iimaan oo ka mid ah dadka ugu codka dheer burshada rayidka, oo ka hadalyaa dhulboobkii ka dhacay Muqdisho ayaa yiri: "..... Qaylo-dhaantii ay odayaashani jeediyeen, ka warama haddii madaxweyne Cabdullahi Yuusuf ama Farmaajo uu joogi lahaa, Sacadaas Xamar maxaa ka dhici lahaa? Ma markii Daaroodku wax xukumaayo keliya, ayaa la qayliyaa, markaas ayaa la mudaharaadaa, oo dawlada la dhaliilaa. Hawiyuhu markuu wax haleeyo lama hadlaayo miyaa? Annaga (ururada bulshada) cid kasta oo timaada, qabiilkuu rabo ha noqdo, waxaan awood u leenahay in aan xaqa ka hadalno...."

2. **Maqnaashaha Xirfadalayda:** ururada xirfadlayda sida ururada garyaqaanada, culimida, macallimiinta, dhaqaatiirka, iyo kuwo kale oo leh karti, iyo aqoon, ahna haldoorka bulshada ayaa ka maqan ururada bulshada. Axmed Shire (dhaqaaleyahan, ka soo shaqeeyey ururada bulshada) waxa uu aaminsanyahay maqnaanshaha kaalintii ururada xirfadlayda in ay hayd mid ka mid waxyaabha hoos u dhigay awooda ururada bulshada rayidka ah. Sidoo kale, Axmed waxa uu ku doodayaa in ganacsatada Soomaaliya oo ah dadka ka faa'iidaya deganaanshaha iyo nabada, aysan garan sidii ay u xoojin lahaayeen nabada iyo dawlad dhiska Soomaaliya. Waxa uu tusaale

u soo qaatay sida ganacsatada Somaliland ay qayb weyn uga qaateen xalintii khilaafaadkii siyaasadeed ee ka horeeyey doorashadii ugu dambaysay ee Somalaland. Waxaa jirta culimada iyo odayaasha dhaqanka oo khilaafyada si weyn wax uga qabta, kuwaas oo in badan xoogga saara sidii wax looga qaban dhacdo dhacday, hase yeeshee ay qorshaha ku darsadaan ka hortaga colaadaha iyo khilaafaadka siyaasada.

3. **Qaabdhismeedka ururada bulshada rayadka ah:** dadkii lafdhabarka u ahaa ururada bulshada oo ku biiray dawlada, hawlgab noqday ama geeriyooday ayaa keenay gaabiska ururada bulshada rayidka (Faysal). Sida uu qorey Afey (Baadi-Goobka Nabadda Geeska), Xasan Shiikh (Maxadweynaha), isaga oo ku hadlaya magaca bulshada rayidka ah, waxa uu soo jeediyey in aan loo baahnayn in ciidamo shisheeye la keeno Soomaalia. Maanta waxaa suurogal ah in uu u codayn lahaa arrintaas. (Harka waxaa bedala, hadba dhanka qoraxdu xigto iyo meesha ay qoraxdu marayso). Dhinaca kale, waxa la tilmaamaa in aysan ururada bulshadu la xisaabtami karin dawlada, iyaga oo dhexdooda ka aradan isla-xisaabtanka, hufnaanta iyo maamul-wanaaga, maadaama ay nuqsaani ku jirto hannaanka hoggaanka ururada bulshada rayidka ah.

4. **Isku-xirnaan la'aan:** waxa la sheegaa in aysan jirin isku-xirnaan xoogan oo ka dhexaysa ururada bulshada rayidka ah. Ururada bulshada rayidka uu ku dhex samaysmay kala qobqobnaanta iyo qoloqolada ka jirta dalka ayaan weli yeelan isku-xirnaan xoogan, oo keenta in ay ka wada duulaan aragti mideysan. Shire waxa uu ku doodayaa in ay kala qaybsanaanta dalka raad ku yeelatay awoodii iyo isku xirnaanshaha ururada bulshada. Waxa ay Axmed ula muuqataa in ururada bulshada aysan aaminsanayn awoodooda, isaga oo tusaale u soo qaatay bulshada rayidka oo dawlada ka codsanaysa ka qaybgalka wada hadalada siyaasada. Sidoo kale, waxa uu sheegay in aragti qof loo tarjumayo si qabyaaladaysan, taas oo rayiga toosan ka dhigaysa mid turxaan leh.

5. **Dhaqaalaha iyo Nabadgelyada:** waxaa ururada bulshada haysata dhaqaale yaraan taas oo gaabis ku keentay abaabulka iyo dhaqaajinta bulshada. Sidoo kale, xaalada amniga ee dalka ayaa xadidaysa dhaqdhaqaaqa ururada bulshada rayidka ah (Faysal). Baafe waxa uu sheegay in uu dhaacawa ugu weyn uu soo gaaray ururada bulshada markii ay Al-Shabaabku u arkeen ururada bulshada in ay yihiin gacan shisheeye oo lagula dagaalamayo. Si ka duwan, aragtida Faysal ee dhinca dhaqaalaha, waxa la oran karaa abuubulka bulshada iyo muujinta dareenka saxda ah ma aha mid u baahan dhaqaale. Maxa yeelay, maanta xaalada lagu jiro waxaa fudud gudbinta fariimaha iyo in ay si deg deg ah ku gaaran cida loogu talogalay.

6. **Dareenka Bulshada:** Bulshada oo aan isku xirnayn ayaan isku aragti ka ahayn danta guud. Sidoo kale , waxaa la oran karaa waxa culus dareenka bulshada sida uu Timacade yiri:"Dadkaan la hadlayaa baan lahayn dux iyo iimaane" ama uu Hadraawi tilmaamay:

*Bulshadeenu waa duul*
*Daacad iyo xishood badan*
*Dun xariira weeyaan*
*Cidna uma darraadaan*
*Dar Allay ku dhaqantaa*
*Dareen waw dhegweyn tahay*
*Ogow doqonse maahee*
*Qofka maamul dalabliyo*
*Dabbaal-joogto hoosiyo*
*Dibindaabyo ugu maqan*
*Degdeg uma tilmaamaan*
*Nabar kulama duulaan*
*Dib bay ugu muddaystaan*
Dulmigiisu waw kayd

## GABAGABO

Bulshada rayidka ee Soomaaliya waxa ay kaalin weyn ka soo qaateen dawlad dhiska iyo daminta colaadaha. Hase yeeshee mudadaan dambe waxa jira hoos u dhac ku yimi kartidii iyo kaalintii ururada bulshada rayidka ah. Sida ay tilmaameen dad aqoon iyo waayo aragtinimo u leh ururada bulshada rayidka ee Soomaaliya, waxaa hoos u dhacaas sababay arrimo badan oo ay ka mid yihiin: (i) awooda dawlada, (ii) qabyaalada, (iii) xirfadlay badan oo aan ka dhex muuqan ururada bulshada, (iv) qaabdhismeedka ururada bulshada, (v) isku-xirnaan la'aan iyo kala qobqobnaanta ururada bulshada, (vi) dhaqaalaha iyo amniga, (vii) dareenka bulshada iyo kuwo kale. Maanta oo ay xaalada siyaasadeed ee Soomaaliya marayso meel ay ka muuqato abuul colaadeed iyo siyaasad murugsan, waxaa loo baahanyahay kaalinta bulshada ee daminta colaadaha iyo siyaasadda cakiran. Si ay ururada bulshadu ay u qaataan kaalintooda, waxa loo baahanyahay hoggaan karti iyo hufnaan leh oo ay yeeshaan daladaha ururada bulshada rayidka ah iyo dalad qaran oo midaysa awoodda ururada bulshada ee kala qoqoban. Sidoo, kale xirfadlayda ka maqan ururada bulshada rayidka ah oo la abaabulo iyo dawlada oo si hufan loo tuso kaalinta ay bulshada rayidku ku leedahay dawlad wanaagga.

*"Maanku waa kan laga fiiriyaa xaajo kaa maqane"*
*Afqalooc*

# BARIGA DHEXE: ISBEDDELLO JUQURAAFI-SIYAASADEED



Dr. Cabdifitaax Nuur Qodax (Ashkir)



Xigashada Sawirka: AI

Subaxnimadii Sabtida, 28/02/2026, dunidu waxay ku waabariisatay duqeymo xooggan oo lagu beegsaday Jamhuuriyadda Islaamiga ah ee Iiraan. Duqeymahan waxaa fuliyay Israa'iil iyo Mareykanka, kuwaas oo muujiyay heer sare oo xoog iyo ad-adayg milatari.

Iiraan, iyada oo aan ka gaabsan, waxay si degdeg ah uga jawaabtay weerarradaas, iyadoo bartilmaameedsatay danaha Israa'iil iyo Mareykanka ee ku yaalla gobolka Bariga Dhexe. Colaaddan ma ahayn mid cusub, balse waxay soo jiitamaysay tan iyo kacaankii Islaamiga ahaa ee 1979, iyadoo marar badan yeelatay wejiyo kala duwan.

Xiisadda ayaa si gaar ah cirka isku shareertay kadib dilkii Ismaaciil Haniyah, hoggaamiyihii ururka Xamaas, oo lagu khaarijiyay magaalada Tehran xilli uu marti ku ahaa dalkaas. Dilkaasi wuxuu sii huriyay colaadda, isagoo abuuray jawi cusub oo dagaal iyo iska hor imaad ah.

Intii uu dagaalku socday, xulufada weerarka qaaday waxay beegsadeen hoggaamiyeyaal sare oo Iiraani ah. Waxaa la dilay hoggaamiyihii ruuxiga ahaa ee dalkaas, Cali Khamenei (1939–2026), iyo saraakiil sare oo ka tirsan ilaalada kacaanka. Sidoo kale, waxaa xigay dilka xoghayihii Golaha Sare ee Amniga Qaranka, Cali Larijani (1958–2026). Ujeeddada tallaabooyinkan ayaa u muuqata mid lagu wiiqayo maskaxda hoggaamineed ee nidaamka Iiraan, inkasta oo aysan muuqan in si fudud loo burburin karo.

Dagaalkan wuxuu yeeshay saameyn ballaaran oo caalami ah. Qiimaha shidaalka ayaa sare u kacay dunida, maciishaduna kor ayay u kacday. Dalalka Khaliijka Carabta, oo deris la ah Iiraan, ayaa iyaguna wajahaya duqeymo iyo khataro amni. Intaa waxaa dheer, marinka istiraatiijiga ah ee Hormuz ayaa gebi ahaanba xirmay, taas oo sii xoojisay walaaca dhaqaale ee caalamka.

Waxay u muuqataa in Israa'iil iyo Mareykanku aysan gaarin yoolalkii ay ka lahaayeen dagaalka, gaar ahaan rajadii ahayd in dilka hoggaanka sare ee Iiraan uu keeni doono kacdoon gudaha ah oo nidaamka lagu rido. Aragtidaas ayaa u muuqatay mid aan dhab ahayn, maadaama aysan dhicin isbeddelladii la filayay.

## ICTIRAAFKA HUMAAGGA AH IYO UJEEDDOOYINKA ISRAA'IIL EE GEESKA AFRIKA

Muddo ka badan soddon sano oo ay socotay raadinta aqoonsiga, waqooyi-galbeed Soomaaliya waxay 26/12/2025 heshay aqoonsi hal dhinac ah oo ka yimid Israa'iil. Tallaabadan ayaa dhalisay muran xooggan oo ka dhex aloosmay bulshada Soomaaliyeed, isla markaana wajahday diidmo caalami ah.

Su'aasha taagan ayaa ah: tallaabada Israa'iil ma waxay ahayd mid degdeg ah mise waxay ka tarjumaysaa istiraatiijiyad hore loo dejiyay?

Taariikh ahaan, madaxweynihii ugu horreeyay ee Israa'iil, David Ben-Gurion (1886–1973), wuxuu dejiyay siyaasad ku saleysan kala qaybinta dunida Muslimka iyo go'doominta dalalka Carabta, iyadoo la adeegsanayo xiriirro lala yeesho dalalka ku hareeraysan.

Sidaas darteed, tallaabada Israa'iil waxay u muuqataa mid ku dhisan qorshe istiraatiiji ah oo fog. Ujeedkeedu waa mid cad: ballaarin iyo xoojinta saameynta juquraafi-siyaasadeed. Tusaale ahaan, Falastiin weli waxay ku jirtaa gacanta Israa'iil, taasoo muujinaysa damaceeda dhuleed ee sii socda.

## GUNAANAD

Dagaalka ka socda Bariga Dhexe wuxuu u muuqdaa mid si weyn u beddeli doona khariidadda juquraafi-siyaasadeed ee gobolka. Saameyntiisu ma aha mid ku kooban hal dal ama gobol, balse waxay taabaneysaa dunida oo dhan.

Waxaa lagama maarmaan ah in dalalka Muslimka ahi yeeshaan siyaasad mideysan oo ku dhisan aragti fog iyo iskaashi dhab ah, si ay ula tacaalaan isbeddelladan waaweyn ee socda.

**W/Q:** Dr. Cabdifitaax Nuur Qodax (Ashkir)



# XIRMAYNTA DOOXOOYINKA:

## ISTARAATIJIYAD BULSHO OO LAGULA TACAALO ABAARAHA SOO NOQNOQDA



Amiir Abdifatah



Xigashada Sawirka: AI

Abaaraha soo noqnoqda iyo nabaad-guurka ku sii fidaya dhulka Soomaalida waxay noqdeen caqabad joogto ah oo halis geliya nolol-maalmeedka bulshada, gaar ahaan bulshada xoolo-dhaqatada ah. Isbeddelka cimilada, xaalufinta dhirta, iyo daaqa xad-dhaafka ah ayaa si wadajir ah u yareeyey tayada iyo joogteynta khayraadka dabiiciga ah. Xaaladdan oo kale, xalalka waara ma aha oo keliya kuwa ka yimaadda heer dowladeed, balse waxa ay inta badan ka bilaabmaan bulshooyinka deegaanka. Mid ka mid ah hababkaas wax-ku-oolka ah waa xirmaynta dooxooyinka–taas oo ah in si ku-meel-gaar ah loo joojiyo daaqa iyo faragelinta si dabeecada deegaanku isu badasho.

## MAXAY TAHAY XIRMAYNTA DOOXADU?

Xirmaynta dooxooyinka waa hannaan ay bulsho deegaan ahi ku go'aansato in muddo cayiman aan xoolo lagu sii dayn dooxada ama aan laga faa'iidaysan si toos ah, si dhirtu u soo baxdo, cawsku u adkaado, carraduna u degto, nidaamka deegaankana uu dib ugu soo laabto dheellitirku. Fikraddani ma aha mid cusub; waxay salka ku haysaa dhaqankii soojireenka ahaa ee "birimagaydo" oo tilmaamayay in la dhowro waxyaabaha nugul sida dhirta qaarkeed iyo xoolaha rimman ama irmaanka ah.

Marka loo eego aragtida cilmiga deegaanka, marka dhul si ku-meel-gaar ah loo nasiyo (resting the land), waxa hoos u dhaca cadaadiska daaqa, xididdada dhirtuna waxay helaan fursad ay ku xoogaystaan. Tani waxay yaraysaa nabaad-guurka, kordhisaa awoodda dhulku u leeyahay inuu biyaha roobka nuugo, isla markaana sare u qaaddaa kala-duwanaanta dhirta (biodiversity).

### Sidee Ayay Xirmayntu Uga Qayb Qaadataa La-qabsiga Abaaraha?

Xirmaynta dooxooyinku waxay si toos ah uga qayb qaadataa dib-u-soo-celinta daaqa, maadaama marka dooxo la xiro xilli roobaad ka hor ama ka dib, cawska iyo geed-cawseedku si dabiici ah u soo kabtaan. Tani waxay yaraynaysaa khatarta in xooluhu ku baaba'aan daaq la'aan marka abaari dhacdo, maadaama dhulku yeesho awood uu ku soo saaro daaq ku filan xilliyada baahidu jirto.

Sidoo kale, xirmayntu waxay door muhiim ah ka ciyaartaa yaraynta nabaad-guurka. Dhirta dib u soo baxda ayaa carrada ka ilaalisa in dabayluhu qaadaan ama daadadku xambaaraan, halka carrada caafimaadka qabta ay awood u yeelato inay biyo keydiso. Tani waxay kordhisaa adkaysiga dhulka, isla markaana sii yaraysaa saamaynta abaarta iyo khasaaraha ka dhasha.

Dhanka kale, dooxada la xiro waxay isu beddeshaa keyd istaraatiiji ah oo dabiici ah, kaas oo loo adeegsado marka baahi timaaddo. Halkii si joogto ah loo daaqi lahaa, waxaa la sugaa xilli gaar ah oo loo furayo si nidaamsan, taas oo ka dhigaysa khayraadka mid la maamulo halkii uu noqon lahaa mid si aan qorshe lahayn loo isticmaalo.

Xirmayntu ma aha oo keliya farsamo deegaan, balse waa hab dhisa mas'uuliyad bulsho. Maadaama ay ku dhisantahay go'aan wadajir ah, waxay kobcisaa wada-tashiga, isku-duubnida bulshada, iyo ku dhaqanka xeerarka heer bulsheed oo lagu ilaaliyo khayraadka guud.

### Dooxada Qalwo: Tusaale ka Tarjumaya Xaaladda

Tusaale muujinaya waxtarka habkan waa Dooxada Qalwo ee gobolka Bari. Kadib xaaluf ba'an iyo daaq yaraansho ka dhashay abaaro isdaba joog ah, bulshada deegaanku waxay 2019-kii go'aansadeen inay dooxada xiraan. Go'aankaas wuxuu yimid wada-tashi iyo dood dheer kadib, waxaana la sameeyey xeerar u gaar ah oo lagu maamulayo fulinta qorshaha, sida ganaax lacageed oo lagu soo rogo cidda jebisa xeerarka.

Muddo kooban kadib, dooxadu waxay bilowday inay dib u soo kabato. Geedo iyo caws hore uga dabar-go'ay ayaa dib u soo noqday, carradiina waxay heshay xasillooni. 2023-dii mar kale ayaa xirmayn kooban la sameeyey si loo sii xoojiyo soo kabashadaas. Tani waxay muujinaysaa in marka xirmayntu noqoto mid nidaamsan oo la socota roobka iyo baahida, ay noqoto xal waara oo wax ku ool ah.

Inkasta oo dooxadani tahay hal tusaale, haddana waxay muujinaysaa mabda' guud: marka bulshada degaanku hoggaanka u qabato ilaalinta khayraadkooda, natiijadu waxay noqotaa mid muuqata.

### Doorka Sharciga iyo Maamulka

Si kastaba ha ahaatee, xirmaynta dooxooyinku ma aha inay ku ekaato dadaal bulsho oo gooni ah. Waxaa muhiim ah in ay waafaqsanaato shuruucda

iyo siyaasadaha ilaalinta deegaanka ee dowlad-goboleedyada. Isku-xirnaanta u dhaxaysa xeerarka bulshada iyo kuwa dowliga ah ayaa kordhin karta waxtarka, isla markaana yarayn karta khilaafaadka.

Haddii dowladdu bixiso taageero farsamo, tababar, iyo mararka qaar dhaqaale, xirmayntu waxay isu beddeli kartaa istaraatijiyad qaran oo la tacaasha abaaraha. Qorshayaasha noocan ah waxay la jaanqaadi karaan siyaasadaha la-qabsiga isbeddelka cimilada (climate adaptation).

**Caqabadaha Jira**

Inkasta oo xirmaynta dooxooyinku leedahay faa'iidooyin badan, haddana ma aha hawl sahlan oo ka maran caqabado. Waxaa jira socoto iyo xoolo-dhaqato aan mararka qaar ka warqabin xeerarka u yaalla dooxada la xiray, taas oo keeni karta jebinta nidaamka. Sidoo kale, baahida degdegga ah ee daaq xilliyada abaarta ama roob yaraanta ayaa ku riixi karta qaar ka mid ah dadka inay ku xadgudbaan go'aannada la isla qaatay. Intaa waxaa dheer, maalgelin la'aanta iyo agab la'aanta ilaalinta joogtada ah ayaa wiiqi karta hirgelinta qorshaha. Si kastaba ha ahaatee, waayo-aragnimada bulshooyin kala duwan waxay muujinaysaa in marka wacyigelin joogto ah la sameeyo, isla markaana cadaalad iyo wada-tashi lagu maamulo, in caqabadahaas la maareyn karo, lana suurtagelin karo in xirmayntu noqoto mid guulaysata.

## GUNAANAD

Xirmaynta dooxooyinku waa xal ka soo burqanaya dhaqanka iyo waayo-aragnimada bulshada, balse sidoo kale la jaanqaadaya mabaadi'da casriga ah ee ilaalinta deegaanka. Waa hab isku daraya hiddaha, wada-tashiga, iyo maarayn nidaamsan. Marka si qorshaysan loo adeegsado, waxay noqon kartaa gaashaan lagula tacaalo abaaraha soo noqnoqda, isla markaana lagu soo nooleeyo dhul horey u xaalufay.

Tusaalaha Dooxada Qalwo wuxuu caddeyn u yahay in xalalka ugu waxtarka badan aysan mar walba ka iman meel fog; mararka qaar waxay ka bilaabmaan go'aan wadajir ah oo ay qaataan dad si qoto dheer ugu xiran dhulkooda. Xirmayntu ma aha oo keliya farsamo deegaan, balse waa hab dib u soo noolayn kara isku dheellitirka u dhexeeya bini'aadamka iyo deegaanka.

**WQ:** Amiir Abdifatah






































**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG